AKADEMIYAHA DHAQANKA

# KACAAN

IKAR BANA

# YAA XOR AH ?



*Mar uu Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanku ka warramayey xornimo, wuxuu yiri, «...... Haddii aynnu rabno inaynnu hore u marno, waa inaynnu ku shaqaynnaa inay Soomaaliya midowdo; Jaalle! ku shaqee Soomaaliya inay xorowdo, xornimo maskaxda ah, xornimo xaq-dhawr ah, xornimo hawada wax kordhiska ah. Xornimo markaan leeyahay waxaan ulajeedaa Soomaaliya waa inay addoonnimada ka baxadaa meel ay joogtaba!.......». Shaqaalaha, iyo xoogsatada ka shaqaysa Wasaaradaha iyo Wakaaladaha iskood u madaxbannaan, hadal uu u jeediyey 4tii Agosto 1973, bay ku jirtey khudbadani.*

*Maalintii Af Soomaaliga la dhigay waxaa durba muuqatay baahida loo qabo meel koriddiisa, uruurintiisa iyo mideyntiisa lagu xannaneeyo. Akadeemiyada Afka iyo Dhaqanka Soomaaliyeed saas awgeed bay u dhalatay. Isla ayaantaas waxaa la arkayey inay tahay lagama maarmaan inay Akadeemiyadu, si ay awood ugu yeelato inay faafiso hawsheeda miraha ka dhasha, hub Dadweynaha uga war geeya yeelato. Hubkii wuxuu noqday warsidahaan Suugaanta, oo loo baxshey «KACAANKA», aanna jeclahay inaan laba eray idinka iraahdo:*

*Kolka hore, sida looga warqabo, Af dhigiddi iyo dhismihi midna ma fududa; dhismahaas ruuxii quursadaana meel fog ma geeyo. Heerka maanta Afkeenna oo kale maraayana, waxaa dhaawici kara:*

1. *Nin Af shisheeye u macaadey, keenna muunaddiisa iyo hodanimadiisana ka dhoohan;*

2. *Mid aqoon yar, welina uusan si fiican afku ugu dhadhamin oo barashadiisa iyo xuliddiisa iyo badajooggiisa ka nooga;*

3. *Kalsooni darri Dadweynaha lagu rido, iyada oo la dacdarreeyo ololoha hirgelinta Afka oo Waddanka ka socda, dhibaatooyinka ka hor yimaada intii laga leexin lahaa, in buuro laga dhigo.*

*Buug baa la waayey, Dugsi wax lagu dhigo iyo macallin baa maqnaaday aragnay, muujinnayna inayan fidinta Afka is hor taagi karin.*

*Nimaan horay noo wadin ayuun bay marmarsiiyo u noqon karaan. Afaf meelo badan, Afrika iyo Aasiyaba, ka hirgeli lahaa ayaa doc-ka-yeer iyo keligi danayste saas ku kufiyeen. Innagu yaynnaan marna oggolaannin taasoo kale.*

*Kolka labaad Afna hikaadda kuma sinna. Wuxuu u baahan yahay in la kobciyo oo la barbaariyo, in murtidiisa la qeexo, in cirib iyo xidid wuxuu leeyahayba laga doodo, meelna la isla dhigo, in lala tartansiiyo loona rogo lagana rogo afafka dhigiddoodu ka da' weyntahay. Hawsha caynkaas ahna, si gacan looga geysto, looma baahna in la yahay abwaan caan ah ama meeladayeen lagu sooo hirto; waxaase loo baahan yahay niyad sami, kalsooni iyo lexejeclo afka kaa haysa.*

*Haddaba, Warsidahaan oo laga maamulo Akadeemiyada, wuxuu u dhashay, una gacma furan yahay, Dadweynaha Soomaaliyeed oo raba inay dhismaha afkooda ka qayb galaan. Qofkii gaar ahaan ugu xeeldheer murtida afkeenna iyo kii afafka shisheeyaha badiya, hase yeeshee isbidaaya, inuu wax biirin karo, aftahanka xeerkeenna iyo hiddaheenna ku hanaqaadiya dhallinyarada iyo hal-abuurka maanta bilaabaya inuu wax noo kordhiyo; intaas — iyo yaanan ku koobine wixii ku soo biiraba — warsidahaani wuu soo dhoweynayaa.*


*Inta nuqulkaan ugu horreeya akhrisatay, waxaan ku boorrinayaa inayan ka daalin, warsidahana waxaan u saadinaya in hawsha culus oo saaran — inkasta oo uu cusub yahay —, inuu si wacan u guto, inta soo maamushay ama wax ku qortayna mahad fara badan ayaan u celinayaa.*

Jaalle MAXAMAD AADAN SHEEKH
Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare



*«...... Kacaanka dhaqaaluhu wuxuu abuurayaa waxyaalaha loo baahan yahay oo dhan oo lagu baabi'in karo jaad kasta oo ah dulmi siyaasi ah. Sidaas daraaddeed, ayay u noqotay waxaan caqliga geli karin ee aan habboonayn, sidii gadaal looga dhici lahaa wax allaale wixii ku saabsan Kacaan dhaqaale ah, illowse, waxaa isweydiin leh: Sidee baa loo tirtiri karaa dulmiga Ummadda? Lama tirtiri karo dulmiga, Kacaan dhaqaaleed la'aantiis. Sidaasi haddii ay dhacdo waa waxaan guul laga gaareyn. Haddiise aan isku koobno taladaas oo qur ah, waxaynnu ku simbiriirixanaynaa hindisaha dhaqaalaha imberiyaalistaha. Waa inaynnu wadnaa sinnaanta ummadda, ka doodnaa, habaynnaa oo markaa dhaqan gelinnaa «sharciyada» sinnaanta ummadaha oo dhan......» (Agoosto-Oktoobar, 1916, Hawlihii la aruuriyey ee V. I. Lenin, Qaybta 23, bogga 74-15).*





Taariikhudu markay ahayd 1-dii Jannaayo 1970, ayaa Guddiga Golaha Sare ee Kacaanka oo Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya, dekreeto ku soo bixiyey go'aan ku saabsan in la dhiso guddi Af Soomaaliga ka shaqeeya iskuna duwa faraha, diyaariyana buugaggii loo dhigi lahaa dadweynaha Soomaaliyeed. Go'aanku markuu dhacay, ayaa la magacaabay niman loo xil saaray fulinta hawlahaas. Nimanka la magacaabay qaardood waqti dheer ayay ka shaqayn jireen, sidii Af Somaali dhigan loo heli lahaa. Guddiga la magacaabay waxaa ku jirey niman macallimiin ah oo ka shaqayn jirey Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, aqoonna u lahaa, sida buugagga loo daabaco. Dawladda tawriga ahi, waxay ka

codsatay guddiga inuu qoro buugaggii dugsiyada hoose. Guddigu guntiga ayuu dhiisha iskaga dhigay, sidii uu si degdeg ah u fulin lahaa go'aankaas. Diyaarinta buugagtu waxay socotay 1970-1972. Intii laba sano ah, ayaa guddigu habeyn iyo maalin shaqaynayey oo uu dhib ka mutay hawlihiisa. Dhibaatooyinka hor istaagnaa guddiga, aad bay u fara badnaayeen, hase yeeshee, bishii Oktoobar 21deedii, 1972, ka hor ayuu Guddigii hawshiisii faraha kala baxay xilkii la saaray. 21-kii Oktoobar 1972, ayaa Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka oo Jamhuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Jaallle Maxamed Siyaad Barre ku dhawaaqay qoraalka Af Soomaaliga, isaga oo caddaynaya go'aankii

Golaha Sare ee Kacaanku iyo Golaha Xoghayayaashu ay gaareen. Go'aan waxaa lagu gaarey, in Af Soomaaliga lagu dhigo far laatiinka. Maalintaasi waxay dadweynaha iyo dadka Soomaaliyeed u ahayd maalin qaaya iyo taariikhba u leh. Waa maalintii ugu horreysey taariikhda ummaddeenna oo loo dhigay afkoodii hooyo oo wax badan gumeysigu cagaha hoostooda ku hayey.

21kii Oktoobar 1972kii, farxad weyn bay u ahayd Soomaali weyn oo idil. Waa maalintii aynnu kaa baxnay kadeedkii naga haystey afkeenna qornaan la'aantiisii, iyo dhibaatooyinkii la xiriirey. Guddiga Af Soomaaligu, intaan lagu dhawaaqin Af Soomaali qoran, wuxuu qoray buugaggii ugu horreeyey buugag loo qoro dugsiyada hoose oo ku qoran afkeenna hooyo.

Buugaggu waxay ahaayeen kuwaan:

Buugagga dugsiyada hoose oo carruurta:

afar buug oo Af Soomaali ah
afar buug oo xisaab ah
buug taariikh ah
buug joqraafi ah
saddex buug oo saynis ah

Buugagga dugsiyada hoose oo dadweynaha:

saddex buug oo Soomaali ah
saddex buug oo xisaab ah
buug ku saabsan fayoobida (caafimaadka)
buug naxwe ah

Abwaan Af Soomaali ah oo hawl yari u dhimman tahay buug fidinta far Soomaaliga loogu tala galay.

Intaas waxaa kaloo weheliyey buugag yaryar ah oo loogu tala galay in higgaadda laga barto. Warqado iyo buugag fara badan ayuu guddigu daabacay, si dadweynaha ay ugu fududaato qorista iyo akhrintuba. Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarintu xooggeedii oo dhan waxay saartay maalintaas sidii dadweynaha loo gaarsiin lahaa alaabtii laga akhrisan lahaa af Soomaali qoran. Taas keliya ma ahee, guddi loo xilsaaray dhigmada af Soomaaliga, ayaa guddiga af Soomaaligu iska soo saaray. Markaas kaddib, baa Kacaanku hub iyo maal u huray sidii loo dhaqan gelin lahaa xilkaas weyn.

# WASAARADDA WARFAAFINTA IYO HANUUNINTA DADWEYNAHA KAALINTEEDII

Guddiga Af Somaaligu wuxuu go'aan ku gaarey, in la dhiso guddi kala socodsiiya dadka Raadiyaha af Soomaaliga qoran. Barnaamij joogta ah, ayaa dadweynaha looga qalqaaliyey Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha. Barnaamijkaasi wuxuu ku saabsanaa, sidii gobollada iyo degmooyinka Jamhuuriyadda Soomaaliyeed loo bari lahaa afkooda hooyo. Meerisyo ku saabsan Naxwaha iyo sida erayada loo kala qaybiyo, sida loogu higgaadiyo si saxan iyo sidii loo dhaqan gelin lahaa eraybixinta hagaagsan, ayaa Raadiyo Muqdisho laga sii deyn jirey, imminkana weli ka socda. Ma aha dadka Soomaaliyeed oo jooga Jamhuuriyadda oo qur ah inta waxbarid loogu tala galay ee Soomaalida gacanta shisheeyaha ku jirtana, meerisyada af Soomaaliga qoran, wax bay kala socdeen, haddana waxay kala socdaan Raadiyo Muqdisho.

Ujeeddada laga leeyahay middaas, waxa weeye, sidii dadweynaha looga tirtiri lahaa aqoondarrida.

# XUBNAHA GUDDIGA AF SOOMAALIGA 1971

Xubnaha Guddiga Af Soomaaligu waxay ka koobmaan siddeed iyo labaatan qof oo u kala qaybsan murti yaqaanno iyo farsamo yaqaanno. Magacyadooduna waa kuwaan:

1. Cumar Aw Nuux
2. Maxamad Shire Maxamad
3. Cabdi Daahir Afey
4. Sheekh Jaamac Cumar
5. Yaasiin Cismaan Keenadid
6. Axmed Cali Abokar
7. Muuse Ismaaciil Galaal
8. Axmed Cartan Xaange
9. Cabdullaahi Xaaji Maxammuud (Insaaniya)
10. Xuseen Sheekh Axmed (Kaddare)
11. Ibraahim Xaashi Maxamed (oo geeriyoodey)
12. Shariif Saalax Maxamed
13. Cabdullaahi Ardeeye
14. Cabdullaahi Xaaji Abokor
15. Maxamed Nuur Caalim
16. Maxamed Xasan Aadan
17. Mustafa Sheekh Xasan
18. Xirsi Magan Ciise
19. Dahabo Faarax Xasan
20. Maxamed Xaaji Xuseen (sheeko xariir)
21. Yuusuf Xirsi Axmed

Isla sannadkaas, markii Guddiga qaar ka mid ihi ka tageen hawshiina ay sii korortay, baa waxaa lagu daray:

1. Shire Jaamac Axmed
2. Iikar Baana Haddaad
3. Axmed Cabdullaahi Qaalib
4. Faadumo Xasan Maxamed
5. Maxamuud Axmed Abuukar

## XUBNAHA GUDDIGA AF SOOMAALIGA 1972

Sannadkaas oo aad u xiiso badnaa oo hawshu aad u culusaatay, waxaa guddiga haddana lagu soo kordhiyey Jaallayaashaan:

1. Yuusuf Sheekh Cali
2. Axmed Ashkir Bootaan
3. Xaaji Aadan Afqallooc
4. Jaamac Xaaji Xasan
5. Axmed Faarax Cali (Idaajaa)

## KAALIYAYAASHA GUDDIGA AF SOOMAALIGA

Waxaa jirey niman kale oo iyana guddiga ka kaalin jirey dibedda, dhinaca farsamada ama dhinaca suugaantaba, amaba xagga maamulidda. Kaaliyayaashu waxay ka qaateen hawsha qayb wacan. Magacyadoodúna waa:


1. Cumar Jaamac Xasan
2. Awees Xasan Cali
3. Aadan Xasan Khalaf
4. Cabdirraxmaan Axmed Yuusuf
5. Sheekh Caaqib Cabdullaahi
6. Yuusuf Meygaag Samantar
7. Cabdi Cabdulle Cali
8. Cabdulqaadir Sheekh

Iyagoo ku ammaanan G.A.S. hawshii uu soo qabtay, haddana baadista cilmiga af Soomaaliga hawsheedu nu dhammaan.

## SOOMAALIDA IYO AMAANTA GEELA

Wax baad aragtaa, markaasay kula weynaadaan ama kula qurux badnaadaan, dabadeedna waad ammaantaa. Waxa Soomaalidu ammaanto waxaa ka mid ah: Dumarka, geela iyo fardaha.

Ammaanta gabdhaha Soomaalidu waxay la qabtaa dadyawga adduunka oo idil, maxaa yeelay, bari iyo galbeed geyiga oo dhan gadhaha waa laga ammaanaa ama gabay iyo geeraar ha lagu ammaano ama hees iyo heello ha lagu ammaanee.




Tan iyo waa dhow, ama tan iyo haddeerba, geelu wuxuu ka mid yahay lafdhabartii nolosha dadkeenna reerguuraaga ah. Cayr iyo xoolo la'aan baa ninkii aan geel lahayn lagu tilmaami jirey, qaar waxay isku habaaraan, «Geel la'aan Alla ku dhig»!. Waxaa iyana jirtey nin haddii xooluhu dhaafaan in la oran jirey, «Hebel xeradiisaa maratay, tuludna laguma arko».

Mar haddii geela iyo nolosha reerguuraagu saas isugu xiran yihiin, waxaan muran ka joogin, inay wax badan ammaanayaan. Gabayo iyo heeso ciiddaas iyo carradaas ka badan oo ammaan geel ah ayay Soomaalidu tirisay.

Shanta waryahaad ee Soomaalidu dhaqato, mid waliba hees gooni ah iyo luuq u gaar ah ayuu leeyahay, guud ahaanna geelaa sida la og yahay ugu hees iyo jiib wacan, looguna jecel yahay. Heesahaas geela loogu heeso, laftoodu way kala duwan yihiin oo midiba mar lagu heeso bay leedahay.

Waxaa jirta heeso lagu heeso, markuu geelu aroorka yahay, mid lagu heeso, markuu darka soo galo, mid lagu heeso markuu fulliinka yahay, mid lagu heeso markuu rakaadanayo iyo kuwo lagu heeso marka uu dheelmataanka yahay oo golaha lagu wado.

Waxaa heesahaas badanaaba tiriya barbaarta geeljiraha ah oo geelana ku ammaana, iyaguna isku maaweeliya, markii ay daal iska dareemaan. Ku luuqaynta heesahaasi waxay geeljiraha u soo jiiddaa adadkaan iyo furfurnaan.



Sayid Maxamed Cabdille Xasan oo gela ka faalloonayey waa **kii lahaa:**

« Caano hal iyo jeera iyo heeshi ramag leh »

Wuxuu rabaa Saydiku inuu na xusuusiyo in geela keliya laga helo caano aan dhammaan oo gù iyo jiilaalba laga hirqado. Erayga « Ramag » waxaa la yiraahdaa marka uu geelu dhalo.

Geelu sidaan meel hore ku sheegnay wuxuu leeyahay heeso badan oo marar kala duwan loogu heeso, waxaana ka mid ah middaan soo socota oo uu ninka ku heesay uga sheekeynayey gaajada iyo caano la'aanta dhimashada hashiisu u soo jiidi karto:

«Geeridaydana guryo ba'ay iyo gablan laga qaad
Geeridaadana gaawe maran iyo gaajo laga qaad
Geerida haween guud la firo iyo guursi laga qaad».

Ragga Soomaalida ah ee gabayaaga ahaa, ammaanta geelana aad loogu bartay waxaa ka mid ah Cumar Xuseen. Cumar wuxuu gaarey inuu yiraahdo:

Inkastuu dhar wada suufiyo, dhag iyo laas qaato
Inkastuu adduun badan dhigtiyo, dheemman iyo daaro
Dhaxal ma leh Soomaaliyaan, dhaqannin koorreeye
Waxa laysku wada dhaafay waa dhogor idiinleeye.

Wuxuu Cumar ahaa ninkii geela ku tilmaamay dhagax naf leh, waana kolkii uu lahaa:

Haddaanu dhadhaab adag ka bixin, laguma dhaarteene
Oo waa dhagax naftoo hayjaddaa, dhigay Ilaahay e!

Nin kale oo gabayadiisa lagu halqabsado, ammaanta geelana aad u yaqaanna waa Cabdi Yuusuf Aw-Magan oo lagu naynaaso «Cabdigalayax).

«Seben xumi maalintuu dhacoo uunku wada seemo
Sac ninkii lahaan jirey waa inuu sulufka raacaaye
Sibraarrada caanaha ku jira suuboy adigaa leh:
Siddeed sano markuu jiro waxaa seedo geri yeesha
Oo wixii la saaraba inuu sido la moodeynnin
Allaylehe markabnimada Soomaaliyeed suuboy adigaa leh».

Dadku waxay yiraahdaan geelu waa markabkii lama-degaanka, haddaad u fiirsatana waa runtood, maxaa yeelay, wax kasta oo culus iyo wax walba oo dheef iyo waxtar u lehba ninka reer-miyiga ahi ratiga ayuu saaraa. Mar aqalkay ku rartaan, oo mar waa dha-ansadaan, oo mar waa ku safraan oo magaalooyinka ayay wax uga doontaan.

Haddii la guuro carruurta iyo waa-yeelka aan socod awoodi karin, ayaa la fuuliyaa illeen dad ma qaadi karee.

Cabdigalayax ratiga oo keliya ma uu ammaanine, wuxuu guud ahaan wada ammaanay geela, waxayna la ahaatay in mar hadduu geel haysto, wax kastaaba u fudud yihiin.

*Axmed Faarax Cali (Idaajaa)*

## RUGTA KUTUBTA (Library)

Waa maxay Kutubtu?...... Rugta kutubtu waxa lagu magacaabaa, «Aqallada kaydinta dadka aqoontiisa» (Store-house of man's knowledge).

Su'aasha aalaaba qofku isweydiiyaa, waxay tahay, «Maxay sidaas ku noqotay?»...... Helidda uu helo su'aashiisa jawaabteeda, ayuu ku noqdaa qofku hindise (Inventor); faylasuuf, injiyeer, fanyahan, joornaaliste, farsamoyahan, matemaatik, saynisyahan, kiimik (kiimikyahan) iwm.

Rugta kutubtu waa meesha qur ah ee qofku ku hawshoon yahay baaris aqoomeed, una hoggaaminaysa isaga waddadii uu ku gaari lahaa furaha su'aashiisa! Waa xarunta lagu kaydiyo wax alla wixii xuddun u ah baarista cilmiga, si sahal ahna looga heli karo. Dadka yaryar iyo kuwa waaweynba way ka faa'iidaystaan rugaha kutubta. Iyagu waxay u kala baxaan dhowr qaybood oo ay ka mid yihiin kuwani:

a) Rugta kutubta ee dugsiyada (school libraries:
b) Rugta kutubta kolleejooyinka (college libraries)
t) Rugta kutubta jaamicadaha (university libraries)
j) Rugta kutubta gaarka ah (special libaries)
x) Rugta kutubta dadweynaha (people's libraries)

Inkastoo ay hawlaha rugaha kutubtu kala geddisan yihiin, haddana guud ahaan ujeeddadooda iyo shaqadoodu waa isku mid. Taasoo ah, inay ka kaaliyaan dadweynaha dhinaca fakarka iyo aqoon kororsiga. Kaalinta ay ka qaadan karto rugta kutubtu ummadda Soomaaliyeed danaheeda iyo horukaca dadweynaha iyo waxtarmada ay u leedahay dhismaha aqoontiisa, waa wax aan muran ku jirin. Dad badan oo Soomaali ah ayaa wax badan ku tallamay, inay wax ka qabtaan, sidii looga dhisi lahaa dalkeenna rugta kutubta lagu kaydiyo, sida dalalka adduunka; laakiin nasiibdarro dawladihii hore, waxay ka qabteen dhaqan gelinta arrimahaas, haba yaraatee, lama arko. Sidaas awgeedna, halkaas waxa ku wiiqmay oo ku curyaamay hawlihii iyo waxtarmadii ay rugta kutubtu u geysan lahayd dhismaha dalkeenna. Haddase, waxaa nasiib wanaag ah, inay u dhalatay dadkeenna dawlad fiiro weyn u yeelatay horumarinta tacliinta dadweynaha iyo hawlaha rugta kutubta ummadda, loona fulin lahaa hawlaheeda, sidii rugaha kutubtu ay kaalin wacan Iminkana, Wasaaraddu waxay ku talo jirtaa, sidii loo dhisi lahaa rugta kutubta ummadda, loona fulin lahaa hawlaheeda, sidii rugaha kutubta ay kaalin wacan uga qaadan lahayd dhismaha tacliinta dadweynaha. Arrintaasi siday ku dhaboobi lahayd waa sidan:

1. KORDHINTA TACLIINTA (supplementary Education).

Dadku waxay dugsiyada ka bartaan tacliin soohdin leh. Sidaas awgeed, waxay u baahan yihiin akhris isbada joog ah oo aan kala go'in. Kaaso ay ka heli

karaan kutubta taal rugta kutubta. Haddii ayan dadkeennu helin akhris taxan, waxay barteen oo dhan, waxay noqonayaan hal bacad lagu lisay iyo wax kama jiraan.

2. CIRIBTIRKA AQOONDARRIDA (irradication of illeteracy).

Tan iyo intii Golaha Sare ee Kacaanku uu ku dhawaaqay qoraalka Af Soomaaliga oo laga qaaday afkeenna hooyo daahii muddada badan ku daboolnaa, ayaa dad fara badani bartay dhigidda iyo akhriskaba. Daadkaasoo waagu markuu u beryey, aqoonina u iftiintay, waxay u baahan yihiin hub weyn oo ay kula dagaallamaan aqoondarrida iyo jahliga. Midaas waxaa si wacan uga kaalin kara, in si degdeg ah loogu dhiso dadkeenna rugaha lagu kaydiyo kutubta.

Meelahaas waxay kaallin weyn ka qaadan karaan horumarka tacliinta, ololayaasha cirribtirka aqoondarrida iyo gaarsiinta cilmiga dadka reer guuraaga ah. Haddaba si loo gaaro dadka reer guuraaga ah, waxaa lagana maarmaan ah in laga dhiso saldhigyo waaweyn (Branch libraries) ee rugaha kutubta magaala madaxda, gobollada iyo degmooyinka. Taas waxay ku xirantahay lacagta loogu talagali-doono, heerka tacliinta iyo hadba sida ay u fusho hawsha Akadeemiyaha Dhaqanka Soomaaliyeed. Arrimahaasoo dhan waa kuwo u furan dood.

3. BAARISTA CILMIGA (Research).

Tacliinta keliya ma ahee qof kastoo baaris samaynaya kutub ayuu ula kaashadaa hawshiisa. Hawlaha bulsha waliba amaba mujtamac kastaaba, way badan yihiin. Qofka beeraleyda ahi wuxuu la tashadaa kutubta ka sheekaynaysa, sida hagaagsan oo beeraha wax looga soo saari karo. Qofka aqoonta u leh dhaqaalahuna, isaguna kutub ayuu u baahan yahay, markuu baarayo arrimo ku saabsan dhaqaalaha. Sidoo kalena, qofka cilmiga bulshannimada oo ah bulshayahan (sociologist) wuxuu u baahan yahay kutub. Dadkaasoo dhammi waxay doonayaan, waxay ka heli karaan rugaha kutubta, oo iyaga u fududaynaysa hawlahooda kala duwan.

4. WAXTARMADA AY RUGTA KUTUBTA U LEEDAHAY UMMADDA.

Rugta kutubta ummaddu waa meesha lagu aruuriyo, laguna kaydiyo wax kastoo lagu daabaco dalka gudihiisa iyo dibeddiisaba. Taasna waxaa ka mid ah kutubta laga qoray dadka iyo dalkaba, xaashiyaha taariikhiga ah (historical documents), kutubta aan la heli karin ee afka qalaad lagu yiraahdo, (rare books), qormada dawladda (government publications) iyo waxyaalo kale oo badan oo qiimo u leh dhaqanka iyo nolosha dadkaba.

Hadalkaygii waxaan ku soo koobayaa sidatan; Cilmiga kutubtu waa xoog yaab leh iyo macallimiin aammusan oo daweynaha maskaxdiisa iftiimiya, kana beddela aqoondarrida, una beddela aqoon, taagdarridiisa taag, cayrnimadiisana hodan. Sida runta ah, adduunka qarsoon oo dhexda kutubta ku jira oo ku xabaalan qofna kama dhergi karo. Qayb libaax ayay ka qaadan karaan tusaalooyinka uu Madaxweyanha Golaha Sare ee Kacaan, Jaalle Maxamad Siyaad Barre uu yiri, «Cudur kula dirir aqoon, gaajo kula dirir aqoon, dibusocod kula dirir aqoon, wax walbana kula dirir aqoon».........

*Jaalle Cabdullahi Cabdiraxmaan (Suuryaan)*
Rugta kutubta ee Akadeemiyaha Dhaqanka

## DHUGMO HOOSE U YEELO — (Geeraar)

Iyagoon dhereg waayin
Iyo dhiibaaraas ku jiraa
Iyo dhulkaba ay xukumaan
Caanaha dhiilka nin buuxshey
Iyo arrin uu dhayal moodiyo
Baarlamaanki dhunkaasha
Ee dhuungaleeyey Maraykan
Bakhtiga dhuuni xalaala
Dhug ka siiyey cantuugee
Cadawgeennu dhigaankiyo
Dhenged aynnu ku saarnay
Dhoofka soo celiyaan
Ku soo laabtay dhexdeenna
Inay soo dhixiyaanee
Dhufeys soo galgashaanba
Iyo dhuunta joogto nafteennu
Iyo Guddidii nafta dhiibtey
Geeshka caadda u dhaarsanoo
dhukuskooda arkaayey
garbadduub dhuyuc xooggu
Wisaaraddaynna dhababnay
dhacmaa u adkaynnay
wixii ay dhigayeen
mar uun bay dhacayeenoo
dhan intaad uga tuurto
ilmihii aan dhicisayn
uu sidkiisi dhammaaday
dhabta hooyo ku hoyso
ee dhulkay daaddihisaa,
Wax dhibaatiyo hoog iyo
dhakafaar laga qaaday
ee dhaliishiisu badnaatay
dhaxamaa iyo tuugtu
arrinkeenna dhagaa la'
dhanna loo fulin waayey
wax ka yeelay dhufaanka
xumaantoo dhan dhigaaya
dhisaneen cid maqleyn
dhisinkeer qushigood iyo
ee dhuungalaa cadawgeenna
masaakiinta dhifkeediyo

* * * * * *

oy dhacaddiid iyo raaxo
dhaashanow Calankeenna
oon ladnaan u dhinnayn
dhudhub uu isku qaado
dheeldheel buu ku jabaa
iyo dhaanwadaa Qarbi doontay
ee dhallankooda cadkiisiyo
dhaylada moodey carruurta
dhaafi weydey cunaaha
dagaalkii dhibta laa iyo
inay dhiigyacabkii
oo isticmaarkeeniyo
iyo dhaqangooyo tabcaayey
soo dhiraandhiriyaanee
markay dheeha wadnaha
Golaha Tawriga dhaartay
dhiirratee ku dhaqaaqday
dhabarkay nabayeeniyo
oo intaa dhawranayey
habeen uu dhab u siiyey
dhufannay aynnu Oktoobar
dhan markaan wax eegno
dhaawacoodu wax maaha
kursigaad ku dhalliishay
mid kaleeto dhigeysey
sagaalkiisi bilood iyo
ee caafimaad ku dhasha
dhabarkuun kama saarra
dhabanhays iyo yaab iyo
ee dhaqaalaa waddankeenna
qabyadeenna dhantaalan
dhawrtu soo hullaneyso
ee sida dhooba walaaqan
dheddigoodka sidiisiyo
ee dhulka ceebta ka buuxdiyo
ragga dhaydan cabbaayee
dhalanteedka xafiiskiyo
la dhextaagan qabiili
iyo taajiriinta ku dheehanee
la cunaayey dhunkaasha
ku lahayn wax dhimaal

* * * * * *

qudbadda aan dhanna ceeb iyo
abtirsiina nin dhaatay
dhicii geeliyo qaadka
dadkii laysugu dhiibey
dhidhkii reer hebel saartay
runta laysma dhalliile e
dheel arooryoo qabaw
murtidiisa nin dhuuxayoo
dhamac ay ka shidayso
isagoon waxba dhaafin
uu dhammeeyey Siyaad
nimankaa dhibsanaaya
een dheg u raaricineyn
dhoosha nooga qoslaaya
dhan ka soo tumaya
boqnaha dheer na jaraaya
mid dhijaasba la siiyo
haddii aan la dhex qaadinoo
dhabannaano ka muuqan
Siyaadow dhismeheenna
dhutis hoosta ka gaabsha
inkastaan ku dhammaanno
dhexda aynnu u duubnoo
dhinac loo wada jeesto
dheerayn maynno tallaabo
dhudhunkay na hayaanoo
dhurwaadaynnu xeraynnay
iyo dheemmanteenniyo luulka
dheri maalin ka doortay
waa dhambaal walahay
qasnadihii la dhuraayey
waa intii la dhameysey
wacdiga aad u dhigaysiyo
waa dhaguugan yihiin
Shaydaan baa ka dhamaasay
dhalan Eebbe ma doorsho
dhaamimaayo sidiisi
iimaan laan ku dhasheen
Dhakhtarna loo heli maayo
dhaqasho loogama jeedo
iyo bugtadeeda dhukaanta
iyo dhibiiq (dhamiijo) looma adkaysto
aynnu dhaafno dabeede
Afartaa dhidba xoog leh
tollaay yaa dhamas laa
Warmuhuu isu dhoobtay
naxligii isu dhaanshey
xaqa uu dhambalaayo
dhabta uu ku hadlaayo
inkastuu dhaxan joogo
dhadhanshaa qalbigiisa
dhawaaqa waanada fiican
wax dhimaalna lahayn
ee maskaxdeenna dhacsiiyo
ee ku dhandiidsanaya
dadku yaanu ku dhaadinna
sacab aan dhab ahayna
dhanna seefta halbawliyo
taranisfeer mid u dhoofiyo
midaan Jeelka u dhiibno
aan dharbaaxo lixaadliyo
oo ka dhammaannin xafiiska
iyo dhaqankeenna gudaha
iyo dheduun baa ku hawaarta
hanti-hawsha-wadaagga
dhammaanteen isu raacno
dhididku uu na tifleeyo
dhexday noo fadhiyaanoo
xarig bay nagu dhaadan
ee dhulka hooyiyo ciidda
af muggi wax dhammayn iyo
dhidarkii ka yaraa iyo
wax u dhiiban jireen,
iyo dhacaankeennii la eeday
ee shubaneysey dhankooda,
wax u dhaadhici maayo
dhaguhu waa xiran yihiin
duddun dhooba aboor iyo
dhagaxna kuu danqan maayo
sida dhuuryada haadkey
dawo aynnu ka dhawrniyo
wanaag aynnu ka dhawrniyo
cadhoolaha dhogor hoolma
iyo neef dhaleeco ku taal
ha ku daalin dhagoolee
dhuugga geela ka laa!
iyo dhaabad aan xididdeeyiyo
dhaafay oo iska daayey

ma ka yeelay dharaar,
runtaan dhaaxo u sheego
dhoohaney kuma toosto
maalintay dhimato
iyadoon dhicinayn
hibataa dhaxalkeeda,
dhakhsa loo qaban waayo
isagoo dhan u duulay
iyo dhikidii kala gooyey
oo aqalkii dhulka yaal
hadalkaygu dhab weeye
ee mirkaana ha dhaafin
inta uu dherer le'eg yahay
geeraarkii ku dhammeeyey.

* * * * * *

weligeedba ma dhaaddo
dhinac bay ka martaa
ay dhammaatay dabeed
wixii dhaafay darraad
haddii dheelliga awrkana
dhabbaduu ku ridaa
oo dhoonhoraaddiyo weelka
oo ubadkii dhan ka sayray
oo dhacay baa la arkaa,
dheh uun uugama jeedo
Siyaadow ha dhalliilsan
dhugma hoose u yeelo

*Guhaad Cabdi Gabayr*

* * * * * *

## AKADEEMIYAHA DHAQANKU BUUGAGGUU DAABACAY

Teeriyo intii la unkay Akadeemiyaha Dhaqanka wuxuu ku talo jirey, inuu dadka ka kaaliyo dhinaca horuumarinta aqoonta dadweynaha Soomaaliyeed, iyo sidii bulsho cusub loo dhisi lahaa oo maskaxda iyo dhaqaalahaba ka xorowda. ·uaas daraaddeed ayuu Akadeemiyunu soo saaray buugag. Buugaggaas ·va... ka mid ah:

1) «Naxwaha Af Soomaaliga» — Waxaa qoray Guddiga Af Soomaaliga.
2) «Halgankii Nolosha» — Waxaa qoray Jaalle Shire Jaamac Axmed.
3) «Rooxaan» — Waxaa qoray Jaalle Shire Jaamac Axmed.
4) «Hooyada yo hawlaheeda» — Waxaa qoray Jaalleyaasha Dahabo Faar... iyo Raaqiya Xaaji Ducaale.
5) «Falashada Beeraha» — Waxaa qoray Akadeemiyaha Dh.
6) «Sheekooyin Soomaaliyeed» — Waxaa qoray Jaalle Muuse Cumar Islaan.


## BUUGAGGA DAABICIDDA KU JIRA

1) «Geeddiga waday» — Waa murtidii Jaalle Cabdi Muxumad.
2) «Murti iyo Sheekooyin Soomaaliyeed» — Waxaa qoray Jaalle Cabdulqaadir F. Bootaan.
3) «Hiddaha Af Soomaaliga» — Waxaa qoray Jaalle Cumar Aw Nuux.
4) «Diiwaankii Sayid Maxamed» — Waxaa qoray Jaalle Shiikh Jaamac Cumar.
5) «Aqoondarro waa u nacab Jacayl» — Waxaa qoray Jaalle Dhamme, Faarax M. Cawl.
6) «Aasaaska fayoobida» — Waxaa qoray Jaalle Dr. Yuusuf Xirsi Axmed iyo Jaalle Yuusuuf Shiik Cali.

Intaas waxaa weheliya buugag kale oo daabicid loo hayo. Dadka waxaan u sheegaynnaa, in buugaggaas laga heli karo Goleyaasha Hanuuninta Dadweynaha Gobollada iyo Degmooyinka Qaarkood.

# QORRAX MADOOBAADKA IYO DAYAX MADOOBAADKA

Qorrax madoobaadka iyo Dayax madoobaadku waxay ka mid yihiin wax-yaalaha taniyo waagii lays abuuray, dadku la yaabi jiray. Waagii xiddigaha aqoontoodu yarayd aad baa loogu diimi jiray amaba dhulalka qaarkood naxdin iyo argagax bay dadka ku noqon jirtay.





Dadka qaarkii wuxuu oran jiray dawladaha mid ka mid ah baa dhacaysa, qaar kalena waxay oran jireen abaar baa dhacaysa kuwa kalena waxay oran jireen, danbigeennii baa batay oo Ilaah baa carooday.

Intii xiddiga aqoontu ay horuumartay, waxaa la ogaaday in Dayaxu, uusan lahayn iftiin u gaar ah oo iftiinka dayaxa ka muuqdaa uu yahay midka Qorraxda. Dayax madoobaadka iyo Qorrax madoobaadku waxay hadda noqdeen wax la yaqaan oo loo kaltiriyo, lana sheegi karo, intayan dhicin ka hor, goortay dhici doonaan iyo meesha dhulka ka mid ah oo laga arki karo.

## DAYAX MADOOBAADKA


Waa kolka dayaxu kala dhex galo qorraxda iyo dhulka oo hooskiisu naga daboolo muuqaalka qorraxda.

D - M: Waxaa ku wacan dhulka oo kolkuu u dhexeeyo dayaxa iyo Qorraxda hooskiisu dayaxa daboolo.




Q - M: iyo D. M. Labaduba muddada ay qaataani ma badna sababtoo ah dhaqsaha orodka dhulka iyo dayaxa daraaddi.

*Axmed Biixi Warfaa*



*Taallada daljirka dahsoon*

1974 waa xuskii sannadguuradii tobnaad oo geesigii, waddanigii lama illoobaankii Maxamed Cabdulle Xalane.

Goob kasta oo cadow shisheeye ah dadkeenna nabadda iyo gobannimada jecel ay isaga hor yimaadaan geesiyaal Soomajeestayaal ah baa naftooda iyo dhiiggooda u huri jirey magaca dalkooda iyo dadkooda oo loo aayi jirey.

**Kumanyaal iyo kumanyaal dhiiggoodu** wax kasta ka qaalisan yahay baa geeri ugu bareeray jiritaankeenna iyo kan carruurteenna.

Marka aannu nabad ku gama'no oo nabad ku toosno, oo carruurta dugsiyada u soofinno aalaaba taa ma xasuusan karro. Waase lagama maarmaan maantoo kale inaan geesiyaasha caynkaas ah xuskooda lama illoobaanka ah, waayeel, dhallinyaro iyo carruur mar qura dib u garwaaqsannaa.

Maxamed Cabdulle Xalane, wuxuu gooni ahaan ugu tilmaansan yahay inuu naftiisa qaaliga ah u huray in shisheeye cadow ahi farihiisa ku taabto calankeenna; taas oo uu geeri ugu bareeray.

Jaalle Maxamed Siyaad Barre isagoo ka sheekaynaya M. C. Xalane, hadalladiisa qaayaha lahaa waxaa ka mid ahaa:

......«Aan ka taariikheeyo Maxamed Cabdulle Xalane; wuxuu ahaa nin askari ah oo Amxaaradu ku dishey Togwajaale; wuxuu ka mid ahaa horay joogtey; waxay ahayd koox ay cadowga is-hor fadhiyeen, waxaa dhacday in kooxdii la laayey; saddex qof keliya baa ka haray; meesha kooxdaasu joogtey oo ay go'doonka ku noqdeen waxay ahayd meeshii calanka Soomaaliyeed uu ku mudnaa; Maxamed C. Xalane markii raggii la baabi'iyey oo ay ogaadeen in ayan meeshii hayn karin, in ay colkoodii weynaa ku durkaan mooyee, ayuu wuxuu diidey calankii inuu meesha kaga tago. Markaas ayuu qaatay calankii oo xariggiisii soo degsaday si uus ula tago oo uusan gacan cadow ugu dhicin; Maxamed C. Xalane way arkayeen cadowgu, markaasay ku fureen boobe naftiisii gooyey; M. C. Xalane isaga oo calaankii ku duuban oo aan sii deynin ilaa ay nafta tii u dambeysey ka baxday ayuu la soo gurguurtey; naftiina waxay kaga baxday markuu calankii ku soo ridey godkii labaad; hadalkii markii naftii ka sii baxaysay uu reebay ee lama illoobaanka ah oo da' walba da'da ka dambeysaa ay ka dhaxlidoonto wuxuu aha: CADOWGU BIRLAB KAMA SAMAYSNA - CADOWGU BIRLAB KAMA SAMAYSNA; Maxamed Cabdulle Xalane wuxuu ku soo simay colkii si uusan calanku cadow gacantiisa u gelin. Inkastoo naftiisii uu waayey ceebtii waa ka soo hoyiyey calankiisii Maxamed Cabdulle Xalane. Xasuusta uu reebay darteed, maanta nin dhintay iyo nin nool, waa isaga keliya, nin lagu xasuustaa Billad Dahab ah Maxamed Cabdulle Xalane, tan iyo maanta dalkeenna; waxaa kaloo lagu xasuustaa Xiddigle-nimo uu ku qaatay dagaal geesinnimo ah; tan saddexaad oo lagu xasuustaa waa in lagu magacaabay Xalane, Xaruntan (Xarunta Tababbarka Kacaanka)...... «Xeradatan waxaa la yiraahdaa Xalane; geesigii calankiisa ka hantay cagta gumeysiga, ee lama yiraahdo Bootego..........».

«In la idiin ka taariikheeyey mooyee xaaladdeenna iyo tan cadowgu sida ay kala ahaayeen (xagga tirada, hubka yo raashinka),....... cadowgaa gumeysi xoog badan dabada ku hayey ...... Soomaali in la baabi'iyaana taladoodu ahayd....... Kuweennu godkii ay galeen say ugu jireen baa dagaalku ku dhammaaday; saddex bilood baa korkooda ku go'day. Anigu waxaan shaahid ka ahay inaan nimankii dhallinyarada ahaa oo dharkii iyo dhididdhawrkiiba ka dhammaadeen ugu tegey godkii; cunnadooduna bariid garcadde ah bay ahayd...... dawadana daciif baan ka ahayn. Haddana uma ay

suuragelin cadow dalka inuu cagta soo dhigo..... Waad ogtihiin waanad maqasheen baan u malaynayaa kuwaa dhaawac ah oo xabbadi ku taal inay inta qorigoodii qaateen ka bexeen isbitaalka oo ay yiraahdeen kolleyba haddaan dhimanaynno, intaan sariir ku dhiman lahayn; aan goobta ku dhimanno oo dagaal ku galeen sidaas kuna biskoodeen; waana joogaan qaarkood haddeer».

Markii aan ugu tegey godadka oo aan iri qaarkood «waryaa waa adiga qaawane sidee ugu adkaysanaysaa qorraxda iyo dhaxanta?», waxaa i illowsiiyey dhaxanta iyo qorraxda sharafkayga iyo waddankayga iyo iimaankayga; ma xanuunsanayo; adaa moodey inaan xanuunsanayee; ha ka biqin meeshayda laga soo geli mahayo iyadoon maydkayga laga tallaabsan». Weligey illoobi mahayo hadalkaas inta adduunka noloshayda ka hartay».

Maxamed Cabdulle Xalane wuxuu 1973-kii ku dhashay Ceelbuur wuxuuna Xoogga Dalka ku biiray bishii Juun 20-keedii 1960-kii.

Kacaanka hantiwadagga ah ee 21-kii Oktoobar ka hor badankeen ma aynnaan maqal, xus iska daaye, geesigaa Maxamed Cabdulle Xalane, maantana magiciisu ha waaree, carruurtuna waa taqaan. Taariikhdii la aasayey oo Kacaanku boorka ka jafay bay ka mid tahay.

Gobannimada iyo kacaanka hantiwadaagga ah iyo jiritaankeennoo idil geesiyaal baa xinjiro u daadshey; waatuu lahaa Cali Xuseen lahaa:

«Bannaankii Dhagaxtuur xinjiro
balaqiyo rag baw baxay baadigoobkaa». Isagoo calanka tilmaamayey.

«Itaal, itaal, itaal, addin, addin, addin, ujeeddadeennu waa ayaamaha dagaalka cadow inaan eryaa», bay maantana maraysaa (heeskii Cismaan Aadan):

Xasuusta geesiyadii dalka nafta
u hurayna ha waarto!

1960-kii markuu Maxamed C. Xalane ku biirayey ciidammada Xoogga, wax markaa la unkayey ahaayeen. 1964-kii itaalkoodu intuu le'ekaa ninkaan ogeynina waa malayn karaa, taliskii siyaasiga ahaa ee ka dambeeyeyna oo talada iyo tabarta ay ka sugayeen waa kii aynnu niqiin. Weliba waqtigaas waa waqtigii doorasho kusheeggii ay ku sii jeedeen. «Xabbaddii oo dusha looga soo daadinayo sidii roob ayaa ciidammadii loo safay inay sanduuqa doorashada xaashiyo ugu ridaan niman raggii musuqmaasuqa ka mid ahaa!», nin masuul ah oo kacaanka ah baa nooga warramay. Wixii lagu dirirayey waddan jecayl lafaha uga beeran iyo geesinnimo ayay haddaba ahayd maalintii Maxamed C. Xalane geerida ka doortay in cadow calankeenna cidla' ka helo ee dhan walba saynnu ka ahayn waa la ogaa. Taasina ammaan weyn oo in looga daydo maahee qiimo kaloo gudi karaa aan la arag weeye.

Maanta ciidankeennu heer wuxuu marayaa, xag walba marka laga eego la oran karo waa ciidankii ama Xooggii Dadka Kacaanka ah (People's Re-

volutionary Army). Mabda'a hantiwadaagga ah iyo heerka aynnu maraynno ummad ahaan, iyo garashada siyaasada iyo idoloojiyadaba iyaga iyo dadweynihii awalba ay ka yimaadeen, layskuse dayi jirey in laga gooyo dib isugu xirtay oo maantay gacmaha is haystaan. Sidaasay ku noqdeen ciidammadii Dadkee Kacaanka.

«Kacaan» waxaa sharaf u ah inuu lambarkiisii 1d oo uu saaro ku xuso geesigii Maxamed Cabdulle Xalane gaar ahaan, iyo geesiyaashii kaloo iyana dalkooda iyo dadkooda naftooda iyo dhiiggooda qaaliga ah u huray.

Xusuustiisa iyo dhammaan kuwa kale xusuustoodu ha waarto!

*M. N. Cadde*

---

## ILLOOBIMAYNNO TAARIIKHDA (17-1-1973)

Illoobimayso taariikhdu,
Ayaantii afkeennu,
ee uu ahaaday kii arlada lahaa,
Illoobimaynno taariikhda,
Ayaantaa ubadkeennu,
ee uu ahaaday kii af qoran lahaa,
Illoobimaynno taariikhda,
Ayaantii aan itaalka,
ee aynnu eriny eray nin kale lahaa.
Ayaantii Oktoobar ilayskii,
kii jahliga eryadey.

Illoobimaynno taariikhda,
uu addoonsiga ka baxay,


illoobimayso taariikhdu,
uu addoonsiga ka baxay,

illoobimayso taariikhdu,
awooddayada ogaanney,

illoobimayso taariikhdu,
ka baxayey uu noo ahaaday,

*Jaalle Cabdi Muxumed*

Maahmaahyo ku saabsan hawlkarnimada, shaqada, tacabka iyo wax dhaqashada.



1. Tabcadaa ma tuugooboo
2. Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan
3. Goorxun socda goorsan yimaada
4. Intay calooshu buki layad cagtu ha bugto
5. Rarmo waa raaska
6. Keligi cunow keligaa celceli
7. Caano nin dhaqay lagama dhowro
8. Ma xoogsade xaaski baahan
9. Qorrax joog ma qado
10. Nin wax dhaqay waraabana u dhaq
11. Baryo baahi kaama furato
12. Baryo badan iyo bugto badamba waa laysku nacaa
13. Col horti hub lahaw
14. Safarow socodkaa hore sahaydaana dib
15. Dantaada lagama dib jiro
16. Dhididaa dhereg ma waayo

Soomaalidii hore hiddo waxay u lahayd hawl jeclida, xilkasnimada iyo hantidhawridda. Qofkii aan shaqada jeclayn, kuma noolaan karin dhaqankii hore ee


Soomaaliyeed. Maxaa yeelay waxay u yiqiinneen qofka aan shaqaysan «meer meerte», «seeg seeg» «xooggi kama dherge» «xaalwaa» iyo tilmaan kale oo badan oo dadku necbaa. Sidoo kale markii dhaqanka magaaladu xoogoobey, qofka aan shaqaysan waxba lama tixgeliyo waxaana la yiraahdaa: «nimaan shaqaysan, shaahu waa ka xaaraan». Tusaale haddii laga bixiyo sida ay odayaashii hore dhallinyarada ku imtixaami jireen shaqo jeclida waxaad ka garanaysaan:





«Haddii wiil cido gabar ka soo doono, waxaa lagu dhihi jirey u tag ragga geedkaas fadhiya». Haddii uu wiilku kadalloobsado oo uusan barida dhulka dhigin waxaa lagu tilmaami jirey, inuu yahay xilkas iyo hawlkareen, haddiise uu salka dhulka dhigo markuu fariisto, gabadha lama siin jirin oo waxaa la oran jirey waa «seeg seeg».

Gabar baa waxaa u yimid nin xoolo badan leh, asii aan ragannimo lahayn iyo mid xoolo yar oo ragannimo badan. Markaas ayay waxay talo ugu tagtay gabar kale oo jinkeed ah. Gabadhii talo doonka ahayd hees waxay ku tiri:



«Nin rag ah iyo nin reer maara leh
iyamaa la raacaa?

Markaasay middii kale ugu jawaabtey:

«Isagaa rogrogi doonee
Nin ragaa la raacaa!».

*Sheekh Caaqib Cabdullaahi*

## HALGANKA CARABTA IYO GARADARRADA YUHUUDDA

Dawladaha Carabta ahi badidood waxay soo dhadhansadeen dhibaatada gumeysiga, kaasoo muddo dheer awood u yeeshay, inuu kala dhantaalo midnimada iyo isku duubnaanta Carabta.

Dawladaha Galbeed oo lixaadka lahaa ayaa u soo baratamay gumeysiga dalalka Carabta. Masar wuxuu rasmi ahaan Ingiriisku gacanta ugu dhigay 1882kii Suudaanna 1889kii.

Ingiriisku wuxuu Falastiin iyo Bariga Urdun qabsaday 1920kii, isla sannadkaasna wuxuu xoog ku soo galay Ciraaq. Faransiisku wuxuu rasmi ahaan u gumeystey Suuriya iyo Lubnaan. 1911kii Talyaanigu wuxuu ku soo duuley oo qabsaday Liibiya.

Aljeeriya waxaa lagu tilmaamaa dhulkii Carabta oo uu ka soo balleeyey isticmaarka Faransiiska oo soo galay sannadku markuu ahaa 1830kii; halkaasoo uu ka dhigtay saldhig uu uga duulo dhulalka kale. Tuunis waxay gacanta u gashay Faransiiska 1881kii Marookana 1912kii.

Intii u dhexaysey 1800-1899kii Ingiriisku wuxuu kale oo gacanta ku dhigay Imaaraatka ku yaal Gacanka Carabta kuwaasoo ay ka mid ahaayeen Kuweyt, Baxreyn, Masqad iyo Imaaraadka ku dhaca xeebta koofureed ee jasiiradda Carabta.

Dhulalkii nasiib wanaag ka nabadgalay soo gelitaankii bareerka ahaa ee gumeysiga Galbeed, waxaa ka mid ahaa Yaman, Xijaas ilaa Najdi.

Dawladihii Galbeed waxay Carabtii ka baaba'sheen xaggii siyaasadda dhaqaalaha iyo noloshii bulshannimda.

Gumeysigii markuu arkay in ayan suuragal ahayn, inuu qori caaraddi ku addoonsado Carabta, wuxuu bilaabay inuu Carabta ku sabo gobannimo maqaarsaar ah uuna abuuro xukuumado iyo boqorro dabadhilif u ah oo dhawra danaha uu ku leeyahay Bariga Dhexe.

Carabtii waa diideen gabannimo siyaasi ah oo ayan ku mataansanayn mid dhaqaale iyo madaxbannaani buuxda. Tallaabadii ugu horreyesey waxaa ku dhiiratey dawladda Masar oo kacaan ku samaysay taliskii boqortooyada ahaa curisayna talis Jamhuuri ah.

Kacaankii Masar ka curtay 1952kii wuxuu noqday mid saameeyey Carabtoo dhan. Jamaal Cabdi Naasir marar badan buu qaawiyey oo dibadda soo dhigay siyaasadda uu maaggan yahay Imberiyaalistaha Adduunweynuhu.

Sidaas darteed, waxaa dhulalka Carabta oo dhan ka oogmey dhaqdhaqaaqyo ka soo horjeeda danaha gumeysigu ku leeyahay Bariga Dhexe iyo dunidoo idilba.

Dawladihii wax gumeysan jirey waxay garteen, in midda qur ah oo lagu hakin karo Kacaanka Carabta ay tahay iyadoo lagu abuuro wadnaha

Bariga Dhexe dawlad Yuud ah; taasoo noqota saldhig laga wareemo loogana duulo waddammada Carabta.

Maarso 1954kii waxaa la unkay Ururkii Carabta, si Carabtu isaga bahaysato gardarrada gumeysiga iyo Imberiyaalistaha dunida, hasa yeeshee waqtigaas dalal badan oo Carab a'i baa ku jirey gacanta gumeysiga, qaat kalena waxay ahaayeen dabadhilif.

Dawladihii reer galbeed waxay isku raaceen iyadoo ay la jirto dawladda Maraykanku in ay oofiyaan mashruucii iyo ballanqaadkii Mr. Balfour wasiirkii arrimaha dibedda oo Ingiriiska oo ballan ku qaaday, in la abuuro dhul iyo dawlad ay Yuhuuddu leedahay.

Sidaa darteed waxaa Falastiin lagu soo guray dhammaan dadkii ku dhegganaa Sahyuuninnimada; waxayna dheceen Carabtii reer Falastiin oo guryahoodii dibedda looga saaray lana baday in ay cumrigooda ku dhammaystaan hanti iyo hoy la'aan.

Dejinta Yuhuudda waxaa fuliyey dawladaha reer galbeed iyo dawladdii Maraykanka ee Madaxweyne H. Truman oo hiil iyo hooba la garab istaagey Yuhuudda.

1948kii iyada oo ay dhiirri gelinayaan imberiyaalistuhu madaxdii Yuhuudda Bin Guryon wuxuu ku dhawaaqay, inay dawlad Yuhuud ahi dhalatay.

Carabtu waxay u qaylo dhaaminayeen xuquuqda qaxootida reer Falastiin, Yuhuudduna waa diiddey in ay oggolaato arrintaas.

Dagaalkii labaad oo Carabta iyo Yuhuuddu isaga hor yimaadeen wuxuu ahaa kii dhacay sannadku markuu ahaa 1956kii markii Jamaal Cabdi Naasir uu toleeyey biyamareenka Suweys. Markaas kaddib, baa ingiriiska iyo Faransiiska iyo Yuhuuddu dagaal ay u dhan yihiin ku soo kiciyeen Masar. Markaas ciidammadii Masaaridu si habboon bay isaga waabiyeen dibna u cesheen Yuhuuddii.

1967kii Yuhuuddu waxay dagaal ba'an oo gaadmo ah ku soo qaadday oo meelo ka qabsatay Masar, Urdun iyo Suuriya.

1967kii Qarammada Midoobey waxay soo saareen go'aankii tiradiisu ahayd 242 oo farayey Israa'iil inay dib uga noqoto dhulalkii ay Carabta ka boobtay. Israa'iil way diiddey inay u oggolaato go'aankaas.

Dagaalkii ugu ba'naa oo dhexmara Carabta iyo Israa'iil wuxuu ahaa kii dhacay lixdii Oktoobar 1973kii; dagaalkaas oo muujiyey xoogga Carabta, beentii gumeysigu adduunka mariyeyna oo ahayd in Israa'iil ay tahay bir aan la loodin karin waxaa caddaatay inay tahay wax kama jiiraan.

Ciidammadii Masaaridu waxay awood u yeesheen inay jibaaxaan dhufeysyadii ay Yuhuuddu lixda sano ka dhidbayeen biyamareenka Suweys jiinkiisa, Suuriyana waxay awood u yeesheen inay dhaawac weyn u geystaan Yuhuudda.

## BURAAMBUR

Cibaado waxay ku dhalatay magaalada Boosaaso 1923kii. Cibaado Cali, Golaha Hanuuninta Dadweynaha ee Hodan bay buraamburrada ka tirisaa, golahaasna badanaa saanteedu kama foga. Sidii kacaankeennu uu hore ugu kici lahaa. dadkuna uu barwaaqo u gaari lahaa ayay fakartaa.

Iyadoo tusaale ka bixinaysa taariikhda wacan ee uu dalkeennu yeeshay intuu kacaanku jirey ee uu dalkeenna iyo dadkeenna hoggaaminayey, waxay tiri:

Indhihii kala qaadnay arligiina noo iftiin
Xaqii oodnaa albaabkiisi baa la furay
Siyaadow ma iishe weligaaba noo arrimi
Alla'e taariikhda nin arkaaba waa ebyamey
Aarmigii lagu islaamaa la eegayaa
Adaa Afrikaanka amarkaagi wada anfacay
Ul iyo diirkeed Islaamkii hadday noqdeen
Diinkii la addeecyey sharcigiina noo adkaa
Niman Ilaahood yaqaan baa arlada xukuma
Ururka Tawraddu adduunkay iftiimiyeen
Dadkii waddankiisa u adeegayoo anfacay
Aftahammiyo orodba dumarkii ku aadi jirey
Islaannimo waa sidii « Taako » lagu ajaley
Annana inamihii abraaraayey baannu nahay
Orodkii Dhagaxtuur awaarihi ayaanti dhacay
Ummuurihi nala tusiyo aarmigii la ridey
Markaan waddankeenna u adkaannay baan aflaxay.
Hantiwadaag baynu nahay hawsha horay ka wada
Dawlad hodamaynnu nahay oon hagaraqoon
Hoggaamiyaheennu amarkiisu waa hagaag
Dalkeennaa hodoma oo waa hanuunsan nahay
Hurdadii laga reysayoo hawshi laga sinnaa
Haggaamiyaheennu amarkiisu waa hagaag

Afkii hooyaa hikaaddiisi lagu hormaray

La hindisaayoo kalaankeenna lagu hadlaa

Horkiciyo harada ceegaagta hogosha roob

Naqa hanaaday oo Islaameedku wada harqaday

Ilaaheen hiilki weeyoo cadaw halaag

Jannada hooskeeda nin habaabay ma harsan karo

Hir doog weyn baa horweynkeennu daaqayaa

Haleelada dhashaa nirgaha loo hitiqinayaa

Hayaankii dheerna hayin baa la raran hayaa

Faras la heenseeyey baa lagu horseedayaa

Haybaddii dunida Soomaali loo hibey

Horukacnayoo hawada gaarney sida la hubo.

*Cibaado Cali Xuseen*

## CIGAAL SHIIDAAD

Cigaal Shiidaad oo ahaa nin reebay sheekooyin aad yaab u leh, maaduna ka buuxdo; wuxuu ku tilmaannaa fulannimo xad dhaaf ah. Cigaal wuxuu ka tegey taariikh, murti badani ka buuxdo.

Sida sheekooyinkiisaba laga garan karo, Cigaal Shiidaad wuxuu ahaa nin Soomaali ah, oo ku dhashay kuna dhaqmay gobolka Gedo. Waxaa kale oo ay sheegeen dadka sheekooyinka Cigaal aad u yaqaannaa, in Cigaal ahaa nin xoolo dhaqato ah oo miyiga ku nool. In sidaasi run tahayna, waxaa laga garan karaa sheekooyinka Cigaal Shiidaad badidood.

Sheekooyinka Cigaal Shiidaad ku baxay ee laga dhaxlay, waxay ahaayeen qaar ay ku jiraan maad aad u faro badan oo xiiso weyn leh. Sheekooyinkaas oo badiba, dadka Soomaaliyeed wada yaqaan, waxaa lagu tilmaamaa intooda badan, inay yihiin kuwo aan laga xiiso dhicin weligood, waana kuwo had iyo goor dadku jecel yahay.

Sheekooyinka Cigaal oo ahaa kuwo aad u tiro badnaa waxaa nasiibdarro ah, inaan hadda ka hor la qorin. Waxaa laga yaabaa ama jirtaba, in dadka Soomaaliyeed ee sheekooyinkaas ya qaanna ayan isku si u wada hayn.

Meelaha qaarkood oo sheekada, waxaa dhici karta, in laba siyood loo kala yaqaan. Hase ahaatee, waxaa jira in taasi wax dhibaato ah ayan u keenayn sheekooyinka Cigaal oo sidoodaba maad socota ah. Si kasta oo ay sheekooyinkaasi u kala duwan yihiinna, haddana ujeeddooyinkoodu waa isku mid. Waxaana ay ku saabsan yihiin dhammaan wax keliya; taas oo ah fulannimo.

## LIBAAXII LABA HALAAD DILEY IYO CIGAAL

Galab galbaha ka mid ah, oo intii Cigaal Shiidaad uu dhallinyarada ahaa, ayaa isagoo geel dheelmaya, libaax ku soo baxay geelii. Libaaxii hal geelii ka mid ah, ayuu afweynta kala jebiey, mid kalana oogaduu kaga degey.

Cigaal markuu arkay mashaqada meesha ka dhacday ee libaaxu sameeyey ayaa talo ku barraahsatey. Cigaal wuxuu talo ku gaarey, in uusan libaaxa iyo geela uu laayey midna waxba ku darsan, geela intiisii kale ayuu dabada kaga dhacay, oo meeshii ka didiyey.

Intii uu geela sii carraabinayey ee uu gurigii ku sii wadey, ayuu ku sii heesay, isagoo xusuusan libaaxii iyo geelii uu laayey, wuxuuna yiri: «Wixii Alif diley Elana ag dhigay waa arkaayoo waa il giirraa, Dameer le'ekaɛ kase dabo weyn, Daa'in Eebbow haygu soo deyn».

Markii uu geelii guryihii tegey, Ci gaal ninna uma sheegin labadii halaad ee libaaxu galabnimadii geela kala haray, iyo sidii uu ka yeelay isagu midna.

Habeynimadii markii lays yiri geelii ha la maalo, ayaa Cigaal labadii halaad ee libaaxii la haray, oo ka mid ahaa geela intaasa irmaan, haruubkii lagu in la liso. Cigaal baa loo yimid oo la weydiiyey labadii halaad inuu sheego goor ugu dambeysey. Isaga oo ka baqayey, haddii uu sheego labadii halaad in libaax la haray galabnimadii, in la yiraahdo «na tus raqdoodii» wuxuu ku adkaystay ee keliya «war kama hayo labadaas halaad goor iigu dambeysey».

Galabnimadii, markii Cigaal soo carraabinayey, ee uu ku soo heesayey, baa waxaa maqleysey gabar iyaduna ari carraabineysey oy Cigaal daris ahaayeen. Gabadhii baa waxay tiri «Galabta markii Cigaal geela soo carraabinayey, wuxuu ku heesayey, «Wixii Alif diley Elana ag dhigay, waa arkaayoo waa il girraa, dameer le' ekaa, kase daba weyn».

Gabadhii markay intaas sheegtay, ayaa la wada gartay, in Cigaal labadii halaad raqdoodii og yahay. Cigaal baa loo yimid oo la yiri «Ina dhaqaaji oo na tus fulayohow labadii halaad raqdoodii aan bahalka soo dillee». Rag badan baa laysku raacay, Cigaal Shiidaad waa la kaxaystay. Waxaa la tegey meeshii libaaxu labada halaad ku diley. Cigaal wuxuu yiri «Anigu bahalkii aan galabta ogaa, meeshaan gudcurka ah ku sugi maayee, gurigii igu celiya».

Raggii badnaa ee ay Cigaal wada socdeen ayaa ka diidey, oo ku yiri: «War fulayohow, ma raggan badan baad ka naf weyn tahay!».

Waxaa lagu heshiiyey, in libaaxii la sugo oo loo cimil galo. Markii uu yimaadana, in halkaas lagu dilo. Cigaal isagu weli, waa didsan yahay oo waxaa u sii muuqda libaaxii. Markii la arkay, in Cigaal fadhi iyo hurdo laga la' yahay, ayaa lagu yiri, «War dhexdayada soo gal oo soo seexo shan nin midigta ayay kaa seexan doontaa, shan kalana bidixda, shan ninna madaxa ayay kaa seexan doontaa, shanta kale oo soo hartayna lugaha ayay kaa seexan doontaaye!».

Intaas markii loo yeelay, ayuu Cigaal oggolaaday, inuu dhinaca dhulka dhigo. Waxaa gaar ahaan loogu heshiiyey, in Cigaal markuu seexdo oo uu gam'o aayar meeshaas looga tago. Waxaa kale oo lagu heshiiyey, in Cigaal xarig lugta looga xiro oo labada halaad middood jilibkeeda lugu soo xiro, si Cigaal iyo libaaxu marnaba ayan isu seegin hadhow.

Sidii baa la yeealy oo Cigaal inta xariggii lagu xiray baa aayar laga tegey, isagoo meeshii raqdu tiil hurda. Cabbaar markii Cigaal keligi meeshii hurdey, ayuu wuxuu dareemay dhaxan uu ku toosay qabawgeedii. Meel uu jiro isagoon war u hayn, ayuu boodey. Xariggii lagu xiray goor uu goostay, Cigaal war kama uusan hayn. Isagoo lalaya ayuu guryihii tegey. Markaasuu kusoo beegmay irrid ooddu u jiidan tahay. Isagoo sidii gamuun la ganay xiimaya, ayuu yiri, «War oodda iga roga!». «Markii ooddii laga rogey ee Cigaal sarsarkii guryaha soo galay, baa ur silloon laga dareemay. Waxaa la yiri, «War waa maxay Alla doori, waxa urayaa?». «Cigaal wuxuu taas kaga jawaabey waa xangeysadii iyo ciinkii aan soo dhex marayey galabta, amase waaba daruurtii quruntay ee nagu da'dey haddaayey!».

Yaab! Bal yaa arkay daruur quruntay?.

*Jaalle Cabdi Daahir Afey*

# TARTANKII 1d EE SUUGAANTA

Suugaanta Soomaalidu waxay soo martay qarniyaal fara badan iyadoo ay ku hareereysan yihiin afaf shisheeye oo si weyn uga dhaqan galay dalkeenna. Ummadaha aan iskaga dhaw nahay xagga kartida dhismaha murtida iyo jacaylkeedaba waxaa ka mid ah Carabta.

Murtida suugaantu waxay leedahay qiiro, guubaabo iyo waano, waxayna ugu weyn tahay waxyaalaha dadka **kiciya ama dejiya. Tusaale ahaan, waxaa noogu filan haddii** aan dhegeysanno ama akhrisanno gabayadii ay tiriyeen laashimiintii hore. Weligaa ma isku dayday inaad dhuuxdid ga-



bay ama guurow, geeraar ama jiifto ku saabsan goob dagaal ka dhacay? Mase la socotaa qaybta ay suugaantu **ka soo qaadatay halgankii** gobannimadoonka ahaa. Mar kalese, ma isku dayday, inaad ogaatid kaalinta ay suugaantu ka geli karto hirgelinta mabaadii'da Kacaanka? Hadal iyo dhammaantiis, waxaa la ogaadey inay suugaantu tahay shayga keliya oo tilmaan **cad naga siin kara waxyaalaha dadku** ku hirto mabda' iyo caqiido intaba.

UJEEDDADII TARTANKA.

Suugaanteennu waxay leedahay murti oo shisheeyuhu ka tilmaan qaato markuu doonayo, inuu ogaado dhaqankeenna. Haddaan dib u raacno taariikhda suugaanta Soomaalida, waxaan ogaan karnaa in suugaanleydu ay ka hadli jireen faan, diradiro, guubaado, waddaninnimo iwm. Markii aan guud ahaan u fiirinno, hore uma jirin suugaan dadka u tilmaamaysa

mabda' ay ku hirtaan. Dhibaatada labaadna waxay ahayd inaan hore loogu hawshoon isu geynta iyo faafinteeda.

Ogaal iyo waaya-aragnimo ku lug leh sababahaa kor ku qoran, ayaa dhaliyey in kacaanku go'aan ku gaaray, in la soo nooleeyo hiddaheenna, si looga faa'iideysto loono faafiyo. Si ra'yigaa caafimaadka qaba loo hirgeliyo, waxaa ugu horrayntii la gartay, in la sameeyo tartan suugaaneed.

U TABAABUSHAYSIGII TARTANKA.

Wareegtadii ugu horreyseya kuna saabsanayd Tartanka Suugaanta, waxaa Akadeemiyuhu soo saaray 11 - 7 - 73. Wareegtadaas waxaa loo diray Gobollada iyo Degmooyinka Jamhuuriyadda oo dhan; waxayna si tifaftiran uga hadleysey habka iyo shuruudaha tartanka iyo waqtiga la qabanayo intaba. Isla wareegtadaas waxaa madaxda Gobollada lagu ogeysiiyey, in tartanku bilaabanayo 10ka Agosto 1973; waxaana lagu magacaabay tartankaas *« Toddobaadkii Suugaanta Degmada »;* Hooballadii ku soo guuleystey Degmooyinkana, waxaa lagu tartansiiyey Gobollada; looguna magac bixiyey *« Toddobaadkii Suugaanta Gobolka»*. Ugu dambaystii wuxuu Gobol walba Xamar u soo diray dadkii tartanka ku guuleystey, si iyana markooda loo tartansiiyo. Taasna waxaa lagu magacaabay *«Toddobaadkii Suugaanta Soomaaliya»*. Laashimiinta rag iyo haweenba leh ama hooballada ka qayb galay tartanka Degmooyinka, way faro badnaayeen. Waxaa kaloo G. Sanaag, iyo G. Galgaduud, iyo tabanka Gobol oo kale waxay tartanka uga qayb galeen qabya la'aan. Waxaanse ka qayb gelin Xamar.

Qaybaha suugaanta oo lagu tartamayey waxaa ka mid ahaa: *Gabay, Guurow, Geeraar, Saar* iyo *Jiifto.*

HABKII IYO SHURUUDIHII TARTANKA.

Tartankani wuxuu ahaa mid waxyaalo badan uga duwan kuwii yaryaraa oo hore u dhex mari jirey dadweynaha Soomaaliyeed. Ugu horrayntii waxaa la gartay, in shuruudaha tartanka oo lagu qiimaynayo gabayga, guurowga, geeraarka, buraamburka, iwm., ay ka koobnaadaan laba keliya; kuwaasoo ah: *Ujeeddada* iyo *qaafiyadda.* Shuruudaha qiimaynta waxaa laga reebay in lagu tartamo luuq, mar haddii dadka loo tilmaamay ujeeddo ay ka soo tiriyaan, ahaydna «KACAANKU WAA BAAQ QODDA DHEER, YUU U YAHAY?».

Waxaa kaloo la gartay waxyaalaha tartanka looga qayb galayo inaan loo fiirin dherar iyo gaabi toona. Qof kasta oo ka mid ahaa Guddiyaasha garsoorka, waxaa la faray, inuu qaybaha suugaanta oo lagu tartamayo si wanaagsan uga dhegeystaa qofka, aadna u dhuuxaa murtida ku jirta iyo sida ay ula socdaan ujeeddadii loo tilmaamay dadka. Sidaas ayaa lagu maamulay garsoorkii tartanka, wuxuu meel walba uga dhammaaday kalsooni iyo qayla la'aan.

## HOOBALLADA IYO MUQDISHO.

Hooballada suugaanta oo ku soo guuleystey tartankii Gobolloda waxay Xamar yimaadeen 14kii Sateembar 1973, waxayna ku soo degeen Akadeemiyaha Dhaqanka. Tirada hooballadu waxay ahayd 34 (5 dumar), waxayna ka kala yimaadeen: G. Bari (3), G. Togdheer (3), G. J. Sare (3), G. Bakool (3), G. Gedo (3), G. Nugaal (3), G. Sh. Dhex (3), G. Sh. Hoose (3), G. Mudug (3), G. Waqooyi Galbeed (3), G. Hiiraan (2), G. J. Hoose (2).

Intuusan tratankii Toddobaadka Suugaanta Soomaaliya bilaaban ka hor waxaa laashimiinta tababar gaaban looga furay Jaamacadda Ummadda, wuxuuna ku saabsanaa *afka* iyo qiimaha suugaanta. Casharrada tababarka waxaa bixiyey dad ka tirsan (Akadeemiyaha Dhaqanka). Waxaa kaloo hooballadu ka faa'iideysteen barnaamij ku saabssanaa dalxiis, oo u suura geliyey, inay daawasho u tagaan: Xarunta Dhallinyarada Kacaanka ee Afgooye, Warshadda ITOP, Mashruuca Beeraha Degdegga ah ee Shalaambood, Warshadda Dharka ee Balcad, Warshadda Sonkorta ee Jawhar, Aqalka lagu kaydiyo alaabada taariikhda leh iyo Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada ee GSK.

Rasmi ahaan waxaa hooballada tartankii u furmay 26kii Sateembar, waxaana shan maalmood kaddib abaalgudkii lagu bixiyey Golaha Maaweelada iyo Madaddaalada. Habeenkaa waxaa ka soo qayb galay madax fara badan iyo dadweynaha 14ka Degmo ee Xamar, waxaana halkaa si xiisa leh loogu dhegeystey barnaamij ay hooballadu soo diyaariyeen kana koobnaa murti iyo maaweelo. Markii barnaamijkii dhammaaday ayaa Jaalle Kulmiye madaxweyne ku xigeenka GSK. abaalgudkii bixiyey. Abaalgudku wuxuu ka koobnaa shahaado sharaf. Dadka guuleystey waxaa ugu horreeyey Jaalle Ismaaciil Faarax (G. Nugaal), Jaalle Cabdulqaadir Xirsi «Yamyam» (G. W. Galbeed) iyo Jaalle Dhoofa Khaliif Siyaad (G. Hiiraan).

## HOBALLADA IYO DAWLADDA HOOSE.

Duqa magaalada Xamar, Jaalle Xasan Abshir Faarax, ayaa magaca Dawladda Hoose hooballada ku marti qaaday muddo toddobaad ah. Waxayna taasi u surra gelisey inay daawasho iyo murti isdhaafsi u tagaan siddeed ka mid ah Degmooyinka Xamar: Boondheere, Waaberi, Wadajir, Xamar Jajab, Hodan, Wardhiigley, Yaaqshiid iyo Cabdulcasiis. Habeen walba waxaa hooballadu tagayeen degmo, waxanaa si xiisa leh oo kacaannimo ku jirto u soo dhaweynayey dadweynaha halkaa deggan. Kulanka iyo murti isdhaafsiga laashimiinta iyo dadweynaha Xamar dhex maray, wuxuu ku hirgalay oo lagu magacaabay «Haysbarato»; faa'iidadiisana waxaa ugu weynaa hooballadoo si wanaagsan u ogaadey heerka maanta la marayo.

Madax fara badan ayaa laashimiinta u qaadday casho sharaf intii ay Caasimadda joogeen, waxaana ka mid ahaa: Jaalle Kulmiye oo ku marti qaaday Rugta Taleex, Jaalle Maxamad Aadan Xoghayaha Wasaaradda Hid-

dha iyo Tacliinta Sare oo ku marti qaaday Hotel Jubba.

HOOBALLADA
IYO JAALLE SIYAAD.

Hooballada suugaantu waxay xafiiskiisa kula kulmeen Madaxweynaha Golahala Sare ee Kacaanka Jaalle Moxamad Siyaad Barre. Kulankaasi wuxuu ahaa 11kii Oktoobar 1973; wuxuuna Madaxweynuhu hooballada halkaas ugu jeediyey khudbad qaaya leh kuna saabsanayd waxtarka suugaantu u leedahay faafinta mabaadii'da Kacaanka, wuxuuna ku taliyey, in loo furo tababbar hanuunis ah ilaa sannadguurada 4d ee Oktoobar. Waxaa kaloo Madaxweynuhu hooballada u sheegay inay maanta iyo intii ka dambaysa Kacaanka uga wakiil yihiin xagga hanuuninta dadweynaha meel kastoo ay joogaanba.

Ujeeddada tababbarku si iyaguna markooda ay u garansiiyaan dadweynaha Soomaaliyeed oo ku nool Gobollada iyo Degmooyinka.

GUULIHII LAGA GAREY
TARTANKA.

Ujeeddadii weyneyd oo ahayd, in la soo nooleeyo lana faafiyo suugaanta waxaa soo raacay waxyaalo kale oo si weyn looga faa'iideystey. Waxaa ka mid ah in la soo celiyey sharaftii suugaanta iyo isku kalsoonaantii hooballada. Waxaa kaloo isbartay hooballada iyo madaxda hoggaanka u haysa siyaasadda dalka. Waxaa kaloo sugnaatay, qof walibana qiray in sharafta iyo dadnimada Soomaalidu ay ku xiran yihiin danaynta iyo faafinta suugaanta.

Faa'iidada tartankani kuma koobna suugaanta oo keliya. Waxaa kaloo ka dhalanaya, in dhaqammada iyagana markooda loo samayn doono tartan, si dhaqanka iyo hiddaha dadkeennu ay u soo noolaadaan una xididdeystaan.

*Jaalle Xuseen Shiikh «Kaddare»*

## SOOMAALIYA (Taariikh gaaban)

Taariikhda Soomaalidu, inkastoo ay fil weyn tahay, raadkeeduna qoddo dheer yahay weligeed ma ayan yeelan ayaan mana helin kansho lugu baaro oo lugu uruursho.

Shisheeyaha taariikhda Soomaalida wax ka qoray badankoodu, uma dan layahayn taariikh Soomaaliyeed qoriddeed iyo uruurinteed ee hadba kolkii taariikhdooda, danahooda ama socdaalladoodu meel ka soo galaan amaba ku dhafmaan arrimaha Soomaalida bay wax ka qori jireen.

Dhererka xeebteeda iyo meesha ay Afrika kaga taal baa waxay Soomaaliya ka dhigeen, tan iyo waa hore, marinkii sahanka, dalmareennada, ganacsatada iyo dadkii badnaayoo arrimaha kala duwan u horseedi jirey.

Nebi Ciise ka hor laga bilaabo, waxaa isdhaafayey oo xeebaha Soomaalida isku weydaaranayey kooxo 4ta gees oo Ifka ka kala socda.

Shisheeyaha dalkeenna yimid waa kuwama? Goormay yimaadeen? Maxay doonayeen, joogiddooduse ma tahay mid saamaysay nolosha Soomaalida xagga afka, dhaqanka, iwm.?. Maxaa maanta la arki karaa oo farta lagu fiiqi karaa oo la oran karaa — raadkaas qolo heblaa waagaas ka tagtay?.

Arrimahaasi waa kuwo weli dihin oo hadda baariddooda lugu jiro, mana ahan kuwo aan halkaan ku hollin karno.

Finiiqiyiintii iyo Faraacinadiiba Taariikhdeenna waa loo cuskadaa. Talisyadii Fircoonnadu xiriir bay la lahaayeen dhulkii loo yiqiin «Bunt». Masar waxay soo diri jirtey doonyo ganacsi u socda. Ganacsatada degganeyd Bunt waxaa lagu tilmaamay inay ahaayeen kuwo dhabiiltanka iyo xirribta ganacsiga yaqaan. Afgarashada shisheeyaha iyo xoogga xiriirkaasi yeeshay waxay ka maragfurayaan jiridda gaddisley reer magaal ah.

«Bunt» waa Soomaaliyada maanta, waxa laga gadan jireyna waa beeyo. Beeyada, farsamooyinka kaloo lagu samayn jirey ka sokow, waxaan looga maarmi karin ku shididda Xabaalaha iyo Guryaha Eebbe. Xiriirkaas isku xiri jirey dhaqaalaha labada dal, isna bari jirey labada dad waxaa laga hayaa warar ku qoran Hiirogliifiya iyo «muugag aslan» (paintings).

Si tifaftiran u soo uruurinta wararkaas iyo qeexidda ulajeeddooyinka «muugagga aslan» waa hawl aqoon gaar ah u baahan, qabashadeeduna lagama maarmaan tahay. Xiriirkaas ganacsigu wuxuu xoog sii yeeshay waagey talineysey Boqoraddii la oran jirey Xatshebsuut, qarnigii XV Nebi Ciise ka hor. Taariikhda iyana gooni loo baarayaa waa xiriirkii Soomaaliya iyo Masar dhex maray kolkii Masar shisheeyuhu u talinayey: Giriig, Roomaan, Carab, Turki......

Xiriir taariikheed oo qoddo dheeraan gooni ah lihi waa kan Carabta iyo Soomaalida dhex maray. Dhinac kasta oo nolosha Soomaalida ka mid

ha Taariikhdaasi waa saamaysay, ku dhafantay oo dheehday. Waa xiriir Diimeed oo tigimmo adki u aasan yihiin. Bal fiiri xagga afka, dhaqanka iyo hiddaha. Taariikhda talisyadii Carabtu Soomaaliya ku haysatey iyo ganacsiga ay Soomaalida la lahyd waxaa lagu tala jiraa in la uruuriyo, loo filtiriyo, la qoro, lana faafiyo.

Dalmareenno badan baa Soomaaliya ka sheekeeyey, waxaase loo baahan yahay in sheekooyinkaasoo idil la lafaguro oo la «Soomaaliyeeyo».

Dalalka Afrika oo dhan baa waxay maanta ku jiraan halgan la yiraahdo «Afrikeynta Taariikhda Afrika». Taas loolama jeedo in aan la tixgelin taariikhihii shisheeyuhu Afrika ka qoray ee waxaa loola jeedaa in qolo waliba iyadu qorato taariikhdeeda si aan loo dhaawicin dhaqandeeda, hiddaheeda, maanka iyo maskaxda dadkeeda.

Xiriirka Soomaaliya iyo Iraan isna taariikh weyn ayuu leelahay. Waa xiriir wada gaarsiisan Afrikada Bari xeebeheeda. Laga bilaabo qarnigii XIII, raadad waaweyn baa laga hayaa: Dhismooyin (guryo), Xabaalo, Masaajiddo.

Saas oo kale, Afrikada Bari, xiriir ganacsi bay waxay la lahayd Shiina iyo Hindiya. Xiriirkaasi xoog buu lahaa goortii Bortuqiisku soo galay xeebaha Afrika. Lacag Shiina leedahay oo xeebahaan laga helay waxay ku siman tahay qarnigii X.

Tuan Dheng Shii wuxuu ahaa qarnigii IX. Cheng Ho oo Boqortooyadii Yong lo la waa (fac) ahaa, wuxuu sheegay in Soomaaliya iyo Shiina xiriir ganacsi lahaayeen, labada dadna isyiqiinneen.

Gaddisleyda Hindiya oo Afrikada Bari iyana raad saas u fog bay ciribta ku hayaan.

Erayo of Hindi ah baa af Soomaaliga ku jira, siiba xagga ganacsiga, dharka, farsamada gacanta, qalin iyo dahab shubka.

Laba dalmareen oo reer Jenofa (Genova) ah, walaalana ah, luguna magacaabo Ugolino iyo Guido Vivaldi baa xeebaha Soomaaliya yimid qarnigii XIII. Imaatinkoodaas kaddib, ilma Vivaldi il-dambe lama saarin, ju' dambana lagama maqal. Midkood wiil uu dhalay oo la oran jirey Sorleone Vivaldi baa isna geeddi baadigoob ah Soomaaliya ku yimid si uu ku ogaado waxa ku dhacay aabbihi iyo adeerki. Sheekadaasi waxay dalmareennada Talyaaniga ku dhalisay dhaqdhaqaaq sahan iyagoo abbaar ka dhiganaya tubtii reer Vivaldi bilaabeen.

Qarnigii XV wixii ka dambeeyey dalmareenno kale baa Soomaalia yimid oo dalkeeda iyo dadkeedaba ka sheekeeyey.

Qarniyadii XV iyo XVI, Bortuqiis baa dhinac kasta u gudbey xeebaha Soomaaliya. Waa waaga xiddigtoodu cirka mareysey oo ay badaha jeexayeen. Meeshay holliyaamba inay ku degaan ama jiscin ka qaataan waxay kula kulmeen Soomaali diiddan in shisheeye dhulkeeda cag soo dhigo. Kolkaas bay weerar galeen. Vasco Da Gama iyo ciidankiisii (1499) Xamar

bay madaafiic ugu godleen. Dhawr gu' kaddib Baraawe ayaa waxaa weeraray Tristao Da Cunha. Isla kol ku dhowna waxay weerar ku sayreen Berbera. 20 sano kaddibna Bortuqiisku xeebta Waqooyi buu taageero siinayey Gumeysato Soomaalida la diriraysa. Gadaalihii dambe, Boqtuqiisku kuma ekaan inuu colka Soomaalida la diriraya hub siiyo keliya ee toos buu u weeraray Soomaalidii gobannimada u halgameysey oo uu Horfiiqa u ahaa Garaad Axmed Ibraahim «Gurey».

Hadda oo afkeenna hooyo la qoray uuna hanaqaaday, Kacaan Aqooneedna la hirgelinayo waxaa lagu tala jiraa:

— In la uruuriyo wax alla wixii taariikh ah oo Soomaaliya laga qoray.

— In la uruuriyo sheekooyinka maansooyinka..... murtida waayeelku xusuusan yahay.

— In la qodo dhulka oo la soo saaro taariikhda aasan: Xamar, Marka, Baraawe, Berbera, Seylac; magaalaooyinka xabaalmay, taallooyinka faraha badan oo Waqooyi ku firirsan, iwm.

Halgankii gobannimadoonka oo Axmed Gurey iyo kii Maxamed Cabdulle Xasan, dhaqdhaqaaqyadii u dhexeeyey ama ka horreeyey raadin iyo uruurin bay u baahan yihiin, siduu uruurin ugu baahan yahay dhaqdhaqaaqii Kulanka Dhallinyarada Soomaalida (S. Y. L.).

Dhaqdhaqaaqyadaas oo dhammi waxay ku soo biyoshubanayaan KACAANKA OKTOOBAR, 1969, oo jideeyey soo noolaynta Taariikhda Soomaalida, kana rogey daboolkii cuslaayoo gumeysigu ku gambiyey afkeenna, dhaqankeenna iyo hiddeheenna.

*Siciid Cismaan Keenadiid*

# CALI XUSSEEN

Cali Xuseen Xirsi, wuxuuna ku dhashay magaalada Burco 1913. Isagu aabbihi kuma garaadsan, hooyadina isagoo shan jira bay dhimatay. Taniyo toban iyo afar jirkiisii, Cali waxaa soo koriyey eheladiisii, gaar ahaanna ina habreedki.

Gabay wuxuu bilaabay markuu siddeed iyo toban jir ahaa, wuxuuse gabaygiisu xoogaabey soddoniyo laba jirkiisii. Sida la ogsoon yahay sannadku markuu ahaa 1945kii, waa waagii dhaqdhaqaaqa Soomaalidu uu aad u sare kacay.

Cali haddii uusan u sidan, wuxuu ka mid yahay ragga gabya, oo nool oo Soomaaliyeed kuwa ugu horreeya. Gabayadiisuna waxay u badan yihiin kuwo ficil gelinaya Soomaalida, guubaabo iyo daljacayl dhab ahna leh.

Wax badan buu siyaasadda gudaha iyo tan dibedda ka gabyey.

Gabayadii Cali Xuseen waxay qayb ka qaateen dhaqdhaqaaqii gobonnimadoonka ahaa ee halganka xornimada dadkeennu ugu jirey.

Tixaha caanka ah oo dadkeennu yaqaanno, waxa ka mid ah:

«Saamaali say damacday dadkuba waa la yaabaye
Dawlad wada harraaniya dunidaba ma joogtee
Haddaydaan dubbaha qaadan dawo yeelan maynnee......».

Gabaygaan soo socda Cali wuxuu tiriyey 1954kii, iyadoon gumeysiga Itoobiya Hawd gacanta ku dhigin, gumeystaha Ingiriiskuse ka ballan qaaday. Ciil iyo caro awgood, wuxuu gabayga ku tilmaamay, inuu lix waxyaalood la mid yahay, wuxuuna Ummadda Soomaaliyeed tusaale ka siiyey, inay gunnimo weyn tahay iyagoo goradda rogta oon Soomaalidooda u sare kicin......».

Ummuurtii markaas joogtey wuxuu ku tilmaamay:

a) Oday gablan ah oo habeensadey.

b) Naag gaari ah oo ninkay jeclayd ka dhintay, mid ayna raalli ka ahayna lagu dirqinayo.

t) Geel harraad la golongolay oo ninkii iyo nirgihiisiiba gabay.

j) Libaax inta gantaali wareentay aad u xanuunsaday, oo aan arkayn wixii ganay.

x) Nin aan garab lahayn oo shisheeye gar eexo ku naqay, iyo


kh) Naakhuude doon cammirani badweynta kaga jabtay asayan weli degin, oo waxa haysta ka murugeysan.

Wuxuu gabay ku yiri:


Gabaygaan rakibay iyo dhulkaan xalay garaacaayey
Gurxanka iyo reenkaad libaax go'aya moodeysey
Gam'i waayey Soomaaliyey gocoshadiinniiye
Sida oday gablamayaan wuxuu dhalay gargaareynnin
Oo fiid garkiyo labada law meel isugu geeyey
Gam'i waayey Soomaaliyey gocoshadiinniiye
Sida gaari kii qabey dhintoo galab la sii qaaday
Oo gorodda loo suray midaan gabadhu dooneynin
Oo geeridiisii ilmada gabax ka siinaysa
Gam'i waayey Soomaaliyey gocoshadiinniiye
Sida geel harraadoo mudkii geri ka dhuubnaaday
Oo goray ninkii maali jirey godol ka soo waayey
Oo golongol waa lugu hubaaye gabanta diidaaya
Gam'i waayey Soomaaliyey gocoshadiinniiye
Sida aar gamuun lagu dhuftoo gubayo waabaygu
Aan geesta ka arkayn wixii nabarka gaarsiiyey
Oo meel gawaana u boxoo miciyihii giijey
Gam'i waayey Soomaaliyey gocoshadiinniiye
Sida geed nimaan garab lahayn lagu gurraynaayo
Oo waxaan gartiisii ahayn guudka laga saaray
Oo ciil la goodaadsadoo gorodda laalaadshey
Gam'i waayey Soomaaliyey gocoshadiinniiye
Sida doonni maal lagu guroo gurada loo buuxshey
Oo ay shukaantii gab tiri gobolna naafoobey
Oo geesigii wadey hammiyey guuldarrada haysa
Gam'i waayey Soomaaliyey gocoshadiinniiye
Afartaa guntaye tala waxaan idinku gawdiidshey
Goldalooladiinnaan arkaa garanna maysaane
Waxay nala gudboon maanta waad garab maraysaane
Gurigaaga aad leedehee gogoshu kuu taallo
Gawraha adoo uga baxaa waa gunnimo weyne
Godkii nagu daboollaan jiree nala ku gaadaayey
Garaad yeelannoo Eebbahay goofkii naga saarye
U guntada xornimadii haddaad gacan ku haysaane
Gaadiidku heeryada mar buu gudub u tuuraaye
Nin guhaad qabaa maalin buu dabarka gooyaaye
Biciidkuba ka soo guluf dameer geesa loo xiraye
Geeddiga miyaydaan arkayn la isu soo guurye.


# FANKU SIDUU KU BILAABMAY

Fan: Waa wax macnihiisu aad iyo aad u qoddo dheer, kuna dhisan karti iyo cilmi, amase maskax si dhadhan wanaagsan wax u abuuri karta. Qofkii barta farsamo amase karti wax u leh aan dadka kale u wada sinnayn, uguna fadhido dhibaato barashadeedu, qofkaas waxa lagu tilmaami ka-



raa, inuu yahay farsamayahan. Farsamayahanku wuxuu leeyahay tilmaan, muujinaysa farsamadiisa oo la yiraahdo «fanyahan». Fanyahannimada cayaar laguma helo, lagumana gaaro si sahal ah, illowse, waa wax la barto amaba lagu helo dadaal, loola kaa-







shado jacayl iyo isu hibeyn. Haddaba, meeshaas waxaa inooga muuqday in fanyahannimada lagu heli ka-





ro laba siyood: Mid la barto iyo mid jacayl iyo isu hibeyn lagu gaaro! Labadaas siyoodba, haddii dhab ahaan arrintaas loogu dhabbagalo, amabase si cilmi ah loo indha indheeyo, fany-

ahannimada waxa loo kaashadaa cilmi. Taasi waxay dhalisay kala hor marinta nolosha farsamada ee dadka, markii laga eego dhinaca shaqadiisa iyo abuuristiisa. Tusaale ahaan, waxaan halkaan ku muujinaynaa magacyada tilmaamay aqoonta uu qofku u leeyahay farsamada; fanka dhar qaa-




dashada, fanka cunno samayska, fanka beer falashada, fanka geedo qorista, fanka xardhidda, fanka muusikada iyo kuwo kale oo badan.

Sidaas awgeed, ayaa fanku wuxuu bilaabmay, markii jiritaanka dadku bilaabmay. Fanka waxa abuuray dadka oo waxaana iska leh isaga. Maxaa




yeelay, fanku waa wax ka soo dhashay wax ka qabadka dadka iyo baahidiisa. Middaas waxaa keenay baahida oo loo qabey nolol, markii ay dadku u baahdeen hoyaad, cunto, nabad. Saddexdan waxyaalood dhexdooda, waxaa ka soo baxay waxyaalo kale oo ku xiran nolsha dadka. Markii hore,




dadku wuxuu ku fakarey, inuu yeesho hoy uu kaga nabad galo qorraxda, roobka, iyo dugaaggaba. Sidaas ayaa baahida loo qabo nolol leh nabad wa-

arta, ay ugu soo dhalatay maskaxda dadka. Qofku, markaas kaddib, wu-xuu gartay, in hogagga qorarka bee-raha ku yaallaa ay yihiin meesha ke-liya oo nabad lagu heli karo. Sidaas ayaa fanku uga dhashay amaba uga bilaabmay hoyashada hogagga buu-raha. Isla markaasna waxaa halkaas ka bilawday Guri dhiska. Arrintaas waxaa ka soo dhambalmay fanka ma-acuunka lagu dhaqmo, oo ay ka mid yihiin: mindida, godinta (masaarta), xeerada, fandhaalka iyo waxyaala kale oo dhammaantood ay ka samaysnaa-yeen dhagax iskood u soo googòay, amase u soo jajabay. Hubkaas ku xir-xirnaa nolosha dadka, waxaa ka soo dhambalmay fañka ugaarsiga iyo kan dagaalka. Hase yeeshee, kuwaasi wax weyn kuma kordhin noloshooda. Wa-ayo, hogagga lagu dhaqmi jirey wa-xay aad uga fogaayeen meesha dheef-tu tiilley. Meesha wax laga heli jirey-na waxay ahayd webiyada jiinkooda oo dadku ka heli jirey cunto la cuno, biyo la cabbo iyo nafley la gabraar-sado.

Mar Alla markii dadku u baahday, inuu soo guurguuro oo ka samaysto guryaha qoryo, ayaa halkaas waxaa ka dhashay fanka fakarka. Inkastoo, markii hore, ay qofka la ahaatay, inuu dego geedaha dushooda, haddana taa-si way u suuroobi weydey, maxaa yeelay, halaqa iyo bahallada ayaa wa-ayahaas dhulka ku badnaa oo baabi' in jirey jiristiisa.

Heerka guryo dhisiddu si degdeg ah, ayuu isu beddeley, waxaana isla markaas bilawday fankii guri dhisid-da koowaad oo ka samaysnaan jirey qoryo laga dul dhiso biyaha, sidii no-losha dadku ay uga nabad gasho ha-lista dugaagga iyo bahallada! Dabaa-lashada, kalluumaysiga iyo ugaarsigu-ba way ku badnaayeen biyaha agag-gaarkooda, maxaa yeelay, meeshii biyo lehba nafleydu kama fogaato!

Arrintaas waa lagu guuleystey, wa-xayna noqotay xeerka labaad ee aqal dhiska adduunweynaha. Heerkii hore, wuxuu ahaa kii qararka hogaggooda la degey, kaasoo maantaba faa'iido u keh dadyowga qaarkood oy aqoon-toodu hoosayso! Maanta waxaa hu-baal noqotay, in laga helay qararka iyo hogagga masawirrihii adduunka ugu horreeyey oo lagu xardhay qarar-kaas dushooda, gaar ahaanna meelaha hoyaadka ahaan jirey oo ay deggena-ayeen dadkii ku noolaa meshaas bo-qollal kun oo sano!

Tallaabadii middaas ku xigtey, wa-xaa ka soo dhashay fanka tacabka beeraha, fanka maacuun dhoobaadka, fanka isticmaalka qoryaha iyo fanka beer waraabiska. Kuwaasoo idiluba, maantada aynnu joogno, faa'iidadooda ayaamba ka yarayn kuwii hore ee ku-manyaalka sano jiri jirey.

Innagu haddii aynnu Soomaali na-hay, aannu ka soo qaadanno fanka dhooba samayska. Maanta waxaan shaki ku jirin, inaynnu nahay dad ay taariikhdiisu aad u fog tahay oo no-loshiisu ay weligeed jiri jirtey, had-dii aynnu ka eegno oo keliya, habka dheryaha, aashuummada, weelasha caanaha, iyo habka kuwa biyaha lagu cabbo, sida aynnu uga samaynno dho-obada! Kaasi ma aha wax ku cusub dalkeenna ama hadda ina soo galay ku dhaqankiisu, laakiinse waa mid

dhaxal ah oo aynnu iska soo gaarney awow ka awow. Arrinta kale, waxay ina tusaysaa, in ilbaxnimadu Soomaaliyeed jiri jirtey oo loo dhoofin jirey dalalka ku yaalla Badweynta Hindiya hareereheeda oo xiriir fogi inaga dhexeeyey marka laysu eego alaabta aynnu ku dhaqanno iyo midda ay ku dhaqmaan dadyowga meelahaas deggani. Dhoobada sida la wada og yahay, waxaa laga helaa dhulka u dhow biyamareenka webiyada. Fanka dhooba qoriddu wuxuu noqday kan ugu faa'iido badan inta kale. Waayihii hore, dhoobada helitaankeedu dhib ma ahayn, maxaa yeelay, meeshii webi maraba dhoobo kama fogeyn. Haddaba waxaa isweydiin leh, weelasha laga soo dhoofiyo dalalka shisheeyaha oo haatan laga helo dukaammada Xaafadda Xamar Weyn; maxay yihiin amaba maxay ka samaysan yihiin...? Jawaabtu waxaa weeye, waa dhoobo la mid ah midda laga helo dalkeenna. Dhoobada webiyada iyo tan alaabta laga sameeyo, waxa keliya oo ku dhex jiraa waxaa weeye, in lagu sameeyey maskax aqoon u leh farsamada dhoobada oo gaar ahaanna, sida dusheeda loogu dheeho waxa la yiraahdaa (glazing) oo ah asalka (rinjiga) u gaarka ah iyada! Waxayna sidaas ku noqotay farsamadii gacanta oo isu rogtey farsamo warshadeed. Haddaba haddii aynnu nahay dal kacaan ku jira oo aynnu doonaynno, inaan dhismo da' iyo dadba, waxa nala gudboon, inaynnu samaynno warshado soo saara alaabta dhoobada laga sameeyo. Isla markaasna waa in loo tababbaro taladaas dad dhaxal hiddo ahaan ugu leh, sida loo farsameeyo dhoobada. Dhanka, muraayadaha, maacuunka aqallada, alaabada birta ama alwaaxda laga sameeyo.

*Iikar Baana Haddaad*
Xaafiska fanka


Iyadoo lala yaabsan yahay liidashada filimmo Reer Galbeed soo muquuniyaan sida:

RINGO, GIRINGO, JAANGO, 007, SUPERMAN, iwm. baa hadda waxaa HONG-KONG ka yimid kuwo ku saabsan indho-fara-iskagelin, calaacalo sidii seeftii wax u goynaya, dad duulaya, dad dhintoo la soo noolaynayo, sixir iyo wax ka sii daran.


**SOW MA HABBOONAATEEN IN AFLAAMTA LA KEENAYAA AHAADAAN KUWO ULAJEEDDO FIICANOO FAYOW LEH DADKEENNANA WAX U KORDHINAYA!**



Faallo uma baahna



Faallo uma baahna



— Nimankaas dhaawaca ah ma Fiyetnam baa wax lagu soo yeelay mase Bariga Dhexe?

— Mayee.... xalay Filin Hong-Kong oo laysku buuranayo galiddiisii bay ku dhaawacmeen.

— Xusuus Filinka u qalantay kala yimaadeen!

## CABDILLE RAAGE DARAAWIISH

Jaalle Cabdille Raage Daraawiish waa gabyaa caan ah. Heesaha, gabayada, guurowyada iyo cayaarahaba wuu allifaa. Wuxuu ku dhashay magaalada Ceeldheere, sannadku markuu ahaa 1934. Magaalada Xamar wuxuu yimid taariikhdu markay ahayd 1957. Shaqada Raadiyo Muqdisho wuxuuuu bilaabay 1961. Isagu wuxuu leeyahay xaas, carruurtiisuna waa saddex wiil.

Gabayada uu tiriyey waxaa ka mid ah tixahaan:
«Shanta maqan» waa gabay uu kaga hadlayo dhulka Soomaalida oo maqan.
«Kohsi», «Qooraansi beenle» iyo kuwa kale oo badan.

## GABASHO

Tixda «Cabasho» waa tix gabay ah oo uu Cabdille Raage ku cambaareynayey dawladihii musuqmaasuqa ahaa oo ku caan noqday eexda, laaluushka iyo qaraabakiilka.

Caynka gabayga anigoo yar baan caarif ku ahaaye
Niman baa cishqi iyo maashi iyo caarya tiriyaane
Caman yare haddaan lay dhex degin laygu celin waaye
Hadbase dunida caynkay tahaan ka cabbir qaataaye
Ma caddaynin maalmahan tixihii caadiga ahaaye
Cambaaraa wejiga iiga taal caajis baan ahaye
Nin dalkiisii gabal caal qabaa lana cinaadaayo
Cayshkii uu keligii cunaa caafimaad ma lehe
Cududaha i kala taagmey iyo cunaha lay haayo
Cadaawaha i qaybshaan qalbiga kala careysnaaye
Rabbi baa cabsi leh haddaan la iscanaadeynin
Amuu gabay ciraab leeyahay iyo cadil lagu dhawro
Caalimkii gabooboo xukumay Cadale loo daaye
Cabdul Guure iyo waxaan og nahay Carab iyo Seefeeye
Codkii Nuur Maxamed Maalin iyo Cali Gamuumaale
Cabdi iyo Salaan Maxamed buu Calanku sarraaye
Aniguna calaammadii la haray camalladoodiiye
Ninse caddiir ku jiifiyo ninkii molla la ciyaaray
Nin cariish ijaartey iyo ninkii daar calaameeyey
Ee weli u ciil qaba mid kale xaw cabbiri weydey
Cashadiisu nimay gaasir tahay ee cayili waayey
Carruuri nimay farqaha haysatee cidaha tuugaaya
Iyo nimaan ciriiriga ogeyn ceyradkiyo oonka
Caddaantana cunnimadaa dhashee carab aad moodeyso
Cimrigooda Eebbaa xukuma kalase ceyn waaye
Cusbaa lagu daraa hilib hadduu caato noqoyaa ce

Cirkoo weyn iyo ceyntoo yar waa
Nimankii caloosha iska cunaa
Cadow maal leh waxaa kaaga roon
Anna caddadda Soomaalidee
Cashadiyo hurdada leylka waan
Caddaankii markuu talin jireyee
Oy ciidda nagu rari jireen
Ciriirigii markii laga baxay iyo
Adduunyada cusboonaatay iyo
Cadow jabay iyo cilmiga saa'idiyo
Inay calaf Ilaahay tahaan
Cawinaada dawlaadka iyo
Cadceedaha galbeed kaa shidiyo
Hays caasinee talaxumaan
Cambuurrada la gaabsaday
Cascasaantu jeerey go'daan
Nin kastoo cubnaan jirey
Cideysiga Qabiilkiyo
Caddaankaa sharduu naga dhex boxo
Waraabaha ciya waxa ka badan
Cawa socodka nimankaa yaqaan
Cagta tuur ka baxay inaad heshaan
Ha calaagsanaatee ka hara
Ceel waa idiin baqay haddaad
Halleys celiyo oo yaan nimcadu
Nimankii casriga daba kecee
Ciiddoo gariirtiyo wax baan
Sidii Carabta wiilkii u kiciyo
Allaw caaddil noo dhali cilaaq

cudur dhammaantiiye
ciil ma dhiciyaane
saqaga ceyrtaa ehe
ciduba meel joogta
ka cajisoobaaye
lana cinaadaayey
ceebti iyo liidki
caasiyadii diinta
calanka nuurkiisa
cudurka dheeraaday
ku cabbiraayaaye
ciidankiyo Xoogga
caalinkiyo Sheekha
cudur ka weyeneyne
shardaan ciribta gaarsiinno
caato ka ekaanno
**sharduu caday ka dhuubnaado**
shardaan curdarka daaweynno
cabbaya dhiiggeenna
coonka shib u yaale
jeer la kala cayrsho
calafiyo iimaanee
loo cag dhigi waaye
cabbi taqaannaane
idin cadaab geyne
caabud laga waayey
uga cabsaayaaye
Cali Abii dhaalib
lagu heshiin waaye

*Cabdille Raage Daraawiish*

# DHISMAHA ISKAASHATOOYINKA DHAGAXA NUURADDA IYO CIIDDA

Golaha Sare ee kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda waxaa wadajir uga soo baxay 25 go'aan oo taariikhda kacaanka Soomaaliyeed kaga jirta dhan weyn ee Ummadda Soomaaliyeed waxtar iyo qaayaba u leh.

25-kaas go'aan waxaa ka mid ahaa, in qodaalka dhagaxda, shidashada nuuradda iyo ciidda dhismaha oo markii hore ay dad gaar ah shatiyaal u haysan jireen, in laga dhigo iskaashato dhaqaale ah oo wixii macaash ah ee dad gaar ah ay heli jireen, gacaanta loo geliyo shaqaalihii markii hore xaqirnaa.

Go'aankaasi intuusan ka soo bixin Golaha Sare ee kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda, kaawooyinka dhagaxda, waxaa laga maamuli jirey Wasaaradda macdanta iyo biyaha, laakiin markii uu go'aanku soo baxay, maamulka iyo iskudubbaridka iskaashatooyinka, waxaa lagu soo wareejiyey Wasaaradda Hawlaha Guud.

Dad dibusocod ah ayaa waxay isku dayeen in ay hor joogsadaan dhismaha iskaashatooyinka, iyagoo faafinaya wax qalbi jab gelin kara ruuxii aan isku kalsoonayn oo garadkiisuna aad u hooseeyo.

Inkastoo dhibaatooyin lagala kulmay dhismaha iskaashatooyinka, haddana waxaa laga gaaray guul weyn oo waxaa la dhisay 21 iskaashato; kuwaasoo ay ka mid yihiin labo iskaashato oo ka koobanta guulwadeyaal.

Markii la dhisay iskaashatooyinka dhagaxda; Wasaaradda Hawlaha Guud, waxay isla markiiba ku dhaqaaqday inay iskaashatooyinka ku barbaariso fikrad ku dhisan kacaannimo, iyadoo u dejisay barnaamij tababbar; hanuunin iyo farbarasho ah oo lagu ciribtirayo aqoon la'aanta.

HEESTA HOOS KU QORANNA WAXAA TIRIYEY NIN KA MID AH ISKAASHATADA:

Waa dharaartii iskaashatada Dhagaxa jebisaa ay dhalatay oo iid bay nooga dhigantahoo waa ku dhaadannaa.

1. Haddaan dhadhaab la jebin oo aan lagu dhammayn
   Dhudhun iyo laxaad

   Dhabbe lama mareen dhismana ama arkeen
2. Haddaan dhadhaab la jebin oo aan dhidid la qubin
   Horuukac dhaqso ah maskax dhaxal gashiyo
   Dhereg lama fisheen.

3. Dhaaxay in badan dhiigmiiratadu
Nagu dhaansatee iska dhicinnayoo
Urur dhiirranoo aqoon dheer watoo
Miinada la dhigo ee lagu dhanbalo
Buurta dhumucda weyn ku dhiirrano
Ka dhursugaayannu nahay
Urur dhiidhiyoo aqoon dheer watoo
Daafaca dhulkana u dhaarsanoo u
Dhimanayoo ku dhiirrano ka dhursugaayannu nahay.

## G A B A Y

### XAAWO JIBRIIL

Xaawo Jibriil Maxamed, waxay ku dhalatay tuulo magaceeda Wisil la yiraahdo ee Gobolka Mudug ka mid ah. Isla tuuladaas ayay Xaawo ku hana qaadday, waxayna ku barbaartaty bulsho Soomaaliyeed oo miyi iyo magaalaba isugu jirta.

Halgankii gobannimadoonkii Soomaaliyeed Xaawo waxay ka tirisay gabayo, geeraarro iyo buraamburraba, oo ay qiimaha madaxbannaanidu leedahay ku tusaalaysay.

Bishii Maajo 1971kii gabay ay ka tirisay siday dawladihii hore ee Kacaanka 21ka Oktoobar ka horreeyey ay wax ku maamuli jireen iyo sida isbaddel u dhacay, sidii yaabka iyo isxilqaanka lahayd oo ay Dawladda Kacaanka ahi uga hor tagtay Cudurkii Daacuunka ahaa ee foosha xumaa, iyo isbaddelka uu dhaliyey mabda'a hantiwadaagga ahi oo Soomaaliya qaadatay waxay ku tiri:

Sir dadkii an qabin yaa biyaha saab u celiyaaye
Samir lagama rooniyo wixii suga Ilaahaye
Saamigiisu waa fiican yahay sikhina weeyaane
Sarta guduudan nimankii fadhiyey nuguma sii deyne
Waxaa lagu salladay ciidankii saanka (saanadda) hayn jiraye
Subixii Oktoobare hadduusan salalin Xooggeennu
Asuusan salabki soo qaadanoo sawdki naga baajin
Soomaaliya waxay noqon lahayd maanta saharaa e (lama degaan)
Sacabbada Allaa noo goglaye sigannay waagiiye
Sujuud baana nugu waajibtiyo xoolo sadaqa ahe
Annagoo samirnay oo daalley oo socon aqoon weyney
Oo aan seexan karin oo hurdada qarow ku soo jeedna
Saxansaxo udgoon oo qalbiga saaqday lugu toosye
Siraadkii Adduunka iyo mahdigan sugeyney weeyaane
Wax dhan baan saraadnaye Ilaah saymo noo di'iye

Sahankoodi waan mahadinnay iyo samafalkoodiiye
Tanna qofkii saluugaa baluu saadsanahayaaye
Samayskiyo sharciga loo sinmiyo nabadda loo seexday
Dhulka saxarka laga dhawray iyo siigadiyo boorka
Sanaca beeraha iyo badarkayaga suuq walbaba yaalla
Markii sulufku dhacay daawadii cudurradii saartay
Qabiilkii nakala socay oo haatan naga suurey
Laaluushka laga soomay oo sanaq la siin waayey
Saraqii wax xada oo gacmaha la isu saaraayo
Sawirkii wax dila oo barqadii suuqa lugu toogto
Subixiyo habeenkii ardada subaca qaadaysa
Si walbaba u eegoo nebcada Eebbe ina siiyey
Sansaan dawladnimo leedihiyo horukac waa saase
Suldaan haddii ad maqashaan dad ways kala sarreeyaaye
Waxa sabarka weyneeyey waa sooryo aabiyehe
Haddii aan sawowney oo kurteen wada sinnaanayno
Sufihi waalan iyo saaqid iyo kii saldana haysta
Suuqaa la wada joogi jirey saacad iyo leyle
Qof waliba sadkuu cunay hadduu dhidid u sayraayo
Sarrifka lacagta dahab baa hortii layska siin jiraye
Iyadoo siddeda ah haddaan dibadda loo saarin
Sannahaabadoodii qarbigu nagu sumeynaayey
Hadduu ina Siyaad yiri ma rabo inaad na siisaane
Sansaan dawladnimo leedihiyo horukac waa saase
Waxbase yaanan soolka iyo cidlada sawdka qabadsiine
Waxa ina sugaayaana waa Soshaliismada e
Haddii aynnu saanraacno waa hilin salaama ahe.

## GABYAAGU QIIMAHA UU DALKIISA U LEEYAHAY

Soomaalida waxaa ka dhex dhashay niman badan oo aqoonta gabay caan ku noqday, magacooduna heer sare dadka dhexdiisa ka gaarey. Nimankaasi waxay muteen in la sheego, taariikhdana ay meel weyn ka galaan, maxaa yeelay, hawshay qabteen baa waxay ahayd mid aan la illaawi karin. Nimanka gabyaa iyadoo la og yahay inya qiimo gaar ah leeyihiin bay waxyaalaha ay ku kala haraan waxaa ka mid ah xagga wadaninnimada. Gabyaagu wuxuu u baahan yahay inuu gabaygiisa muujiyo isagoo ku hiranaya ujeeddo ku dhisan danta dadka iyo dalka ama arrin gabyaaga gaar u ah, farxadi ha ka keento ama uurxumo ha ka keento e.

Gabyaaga niyada wanaagsan oo waddaniga ahi wuxuu ummaddiisa ku abuuri karaa maskax hufan oo horusocod ah, waxaana laga helaa ku dayasho wanaagsan. Qofka gabyaaga ahi wuxuu dhadhamaa ama uu la muuqdaa gabaygiisu siduu yahay maxaa yeelay gabyaaga niyada waddaniga ah leh ayaa waxaa ka soo baxa erayo waddani ah oo dadka tusaale wanaagsan u noqda, goor walbana la

socda danaha daweynaha. Haddiise gabyaagu maalinba dabayshu dhinacay u dhacayso ama dantiisu ku jirto uu gabaygaasu u socdo waxtar ummadda u ma yeesho ee waxaa loo aqoonsadaa inuu yahay labawajile.

Ilaa haddeer dadka Soomaaliyeed waxay qirsan yihiin inay jiraan iman Soomaali ah oo gabayaashoodu ay tilmaamayaan waddaninnimadooda sababtoo ah mar walba waxay la socdeen danaha dadkooda iyo dalkooda.

Nimankaas gabyaaga ah qaar waxay la kowsadeen jeerarkii xornimadoonka, qaarna way ka horreeyeen. Kuwaas waxaa ka mid ah Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, oo maalintuu dalkiisa u danqaday taniyo dhimashadiisii dadka Soomaliyeed gabayadiisa ku dagaal gelin jirey isagoo uga digaya gumeysiga midad kasta ha lahaado e. Sayid Maxamed inuu ahaa gabyaa waddani ah oo gabaygiisu dadkii dhulkooda xoreyntiisa u dagaallamayey uu waxtar u lahaa waxaa la sii wada ogaadey gabaygiisii uu tiriyey markii Daraawiish gumeysigu jabiyey kaddib. Gabaygaas waxaa ka mid ah:

Waa idin dagaayaa kufriga ad u debcaysaane
Dirhankuu idiin qubahayaad dib u go'aysaane
Marka hore dabkuu idin ka dhigi dumar sidiisiiye
Marka xigana daabaqadda yuu idin dareensiine
Marka xiga dalkuu idin ku oran duunyo dhaafsada e
Marka xiga dushuu idin ka rari sida dameeraa e
Mar haddaan dushii Adari iyo Iimey dacal dhaafay
Maxaad igaga diigaataan berruu siin la soo degiye.

Waxaa kale oo jirey niman kale oo gabyaa ahaa oo dadka taariikhda wax ka yaqaan, gabayaashana uruuriyaa ay aqoonsan yihiin wadaninnimadooda. Nimankaas waxaa ka mid ah Cismaan Keenadiid oo halgankii gobannimadoonka gabayo badan ka tiriyey isagoo dadka tusaalaynaya gobannimadu waxa ay tahay, ugana digaya gumeysiga af macaanintiisu inayan hodin. Jeerar badanna wuxuu ka gabyey dhaqanka Soomaalida dhinaca san iyo kan xunba, gaar ahaanna dadka wuxuu uga digi jirey dhaqanka shisheeye qaadashadiisa. Cismaan Keenadiid oo ah nin far Soomaaliyeed soo saaray; wuxuu leeyahay gabayo waxtar u leh dadweynaha Soomaaliyeed maxaa yeelay meelo badan oo gumeysigu dadka uga soo dhuuman karey wuu ka digey.

Gabaygaan hoos ku qoran oo tusaalaha aan u soo qaatay Cismaan Keenadiid wuxuu tiriyey markii Soomaalidu gobannimada gudaha ah ay qaadatay, nimankii talada loo dhiibeyna danahoodii gaarka ahaa ay u jeesteen. Xooggii ururka S.Y.L. na uu kala daatay. Gabaygu wuu dheer yahay, waxaanse ka qaadanayaa qaybtiisii dambe in ka mid ah.

Cismaan wuxuu yiri:

« Xurmaa taqaddun keentee haddii lays tixgelin waayey
Tol tol iyo anaaniyo haddii la ina taabsiiyey
Teersana raggaan dhigan haddii taladi loo dhiibey
Taageerkii Leegada haddii laysku tuhumeystey
Dadkii tuunsanaan jirey haddii kala taggiis joogo
Tallaahidiyo dhaartii haddii layska wada tuuray
Tafarruqa kuwii ina ku ridey toodi suubsade e
Taws aan baxayn iyo bugtay nugu tallaaleene
Tubtii ina ka leexshiyo jidkii ina ku toosnaaye
Tashigiiba sidii loo gafaan weli tabeynaaye
Tawfiiq ma noqon wiilashii taajka loo xiraye
Tacaddi aan yarayn baa ka dhacay tay ku kacayeene
Ninkii tabar yar maalkiisa waa laga takooraaye
Maraykaanku nugu taaganoo taabyey jahadiiye
Amxaarana tahdiid iyo waxay tiri naloo sheegye
Cadawga soo tartamayiyo cabsida loo tawaley ruuxa
Laye tamashle keliyey hayaan tiilka madaxdiiye
Dawladnimo tabtaas lugu dhaqaa tacajub saw maaha».

Dadka gobannimadoonka qaybta weyn ka qaatay way badan yihiin. Waxaana ka mid ah Jaalle Cali Xussen. Cali waxaa weeye gabyaa weyn oo jeerkii gobannimadoonka si wacan u halgamay, kana muuqan jirey dhinaca dadweynaha Soomaaliyeed meesha dantiisu ay jirto, gabaygiisana Soomaalida uga dhigay COD lagu baraarujiyo iyo hub gumeysiga lagula diriro.

Cali gabayadiisa iyo geeraarradiisa waddaniga ah, waxaan ka soo qabsanaynnaa geeraarkaan soo socda, lana yiraahdo *waraabahakan ciyaayow.*

Waraabahakan ciyaayow
Cuudku waa dib jiraaye
Ma ceelkii Jigjigaad baad
Mise waad cuni weydayoo
cadaawuhu eryanaayaye
dhanna caanad ku haysan baa
caro kaa degi weydey
haddii aad cararaysid
inay maanta caddaatayoo
calankiisu rogmaayo
caawa taa garanaynin
cid baan kuu warramayne
waryaahee casha dhow
dhulkaa ciira ka duuli
inaad jiir ka catuugi
cirifkii Herereed cararoo igu sug!
ma caawaadan cashayn?
ma ciddaan wax ka goosmin?
cad baruur leh ka weydey?
raggaan caatadu laysaye
cayr gidaarka la taagane
camalkiisu ku qaadayoo
waan ku caawin lahaaye
ma cid baad wax ka saari
cadaawihii la dilaayayoo
miyaanad caarif ahaynoo
cilmi baanad lahaynoo
bal codkayga dhageyso
col baa soo bixi doona
caddiin aan la bislayn
Calaa kuugu damiinehe

*Muuse Cumar Islaam*

Isagoo sifaynaya qofka hantiwadaagga ah, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka oo Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliyeed, wuxuu yiri «Qofka hantiwadaagga ahi waa kan yaqaan hawsha waddankiisu ka sugayo oo haddana waajibkiisa ka soo baxa. Dhismaha dalku wuxuu u baahan yahay muruq, talo adag iyo xoog ......» Mar uu ka hadlayey haddana dhinaca hantiwadaagga wuxuu yiri Jaalle Siyaad, «........ Hantiwadaaggu inooma baahna ee innagaa u baahan, si aynnu dalkeenna hore ugu marinno, waxay u baahan tahay inaynnu hanti-



wadaagga habkiisa ku dhaqannaa, waana habka keliya ee ummaddu isku afgaran karto, ujeeddada la doonayana lagu gaari karo! ......» Waa hadal uu u jeediyey Wakaaladda Ganacsiga Ummadda (ENC), 28 Agoosto 1973.

# SHEEKOOYINKA IYO RIWAAYADUHU MAXAY KALA YIHIIN

Intii aan qoraalka Af Soomaaliga lagu dhawaaqin ka hor, riwaayadaha iyo sheekooyinka lama qori jirin, sida dhinacyada kale oo suugaanteenna. Hase yeeshee mar haddii afkeenna la qoray oo uu dhaqan galay, waxaa loo baahan yahay, in fiiro loogu noqdo waxa loola jeedo riwaayadaha iyo sheekooyinka. Afafku waxay hore ugu mareen ma aha oo keliya folkoloorka iyo dhaqanka, illowse, waa kaalinta ay sheekooyinka iyo riwaayaduhu ay kaga jiraan nolosha afka iyo suugaanta iyo waxyaala kale oo badan. Riwaadaha iyo sheekooyinku waa muraayaddii laga daawan lahaa dhibaatooyinka iyo dawadooda dhaqanka ka haysta ummad kasta oo ku nool dunida.

Qorayaalku waxay riwaayadaha iyo sheekooyinka ku muujiyaan meesha ay ka taagan yihiin isbeddelka iyo horukaca ummad kasta.

Maanta waxaa nala gudboon inaan geesinnimo gelinno qorayaasha, sidii ay u muujin lahaayeen hindisahooda iyo ra'yigoodaba.

Markii la dhaqan geliyey afkeenna hooyo, dadweynuhu wuxuu bilaabay, inuu isku dayo, sidii uu riwaayado iyo sheekooyin jaad cusub ah u qori lahaa. Taariikhda Soomaalidu aad iyo aad ayay uga buuxdaa waxyaalo waaweyn oo saameeyey nolosha dadkeenna iyo dalkeennaba. Sidaas ayaa waxyaalo waaweyni oo taariikh ahi, inooga lumeen, intaan afka qoran lagu dhaqaaqin. Hadda ka hor, niman qorayaal ah ayaa ku dadaalay, inay riwaayado allifaan waxaase jirta guud ahaamba qaabka cusub oo riwaayadaha loo sameeyo oo aan dhab loo aqoon. Taasina waa mid u baahan in si degdeg ah wax looga qabto oo xoogga la saaro iyadoon dhanna la fududaysan. Waxa intaas raacda, inaynnu u baahan nahay jaadka riwaayadaha ahaanba qaabka cusub oo riwaayadaha muujiya habkiisa cusub iyo kacaannimaba. Halkan waxaynnu doonaynnaa, inaynnu uga sheekaynno jaadadka sheekooyinka iyo riwaayadaha ka dhaqangalay adduunweynaha iyo inta ay u kala baxaan.

Ujeeddadu waxa weeye, inuu qofku garto, markuu qorayo riwaayad ama sheeko cusub jaadka ay tahay, sidii ay farsamada qoristu ugu hagaagi lahayd. Riwaayadaha iyo sheekooyinka dunida ku caan noqday, waxay kala yihiin:

1. Daramada (drama)
2. Cayaar (play)
3. Noofeel (Novel)
4. Ramaansiyad (Romance)
5. Satiira (satire)
6. Komeediya (comedy).

Riwaayado badan ayaa soo baxay oo u badan jacayl, waxaannuna haddii aannu u dhabbagalnay ogaannay, inay jiraan laba ra'yi — mid xagga ganacsinnimada tix gelinaya oo u

doodaya, in riwaayadaha jacaylka ah oo dadka qaar jecel yahay, lacagna laga helayo la dhiirri geliyo — kan kalena uu ka eegayo xagga wax baridda, hanuuninta iyo kacaannimada oo isaga qudhiisu uu qabo, in dadweynuhu; sida kan hore loo galo uu u geli lahaa! Hadal yo murtidi hadday dhab tahay oo ay labadaas ra'yi jiraan, annaga kan dambe ayaa nala qumman, haddii aan laysku wadi karin.

*Shire J. Axmed*

## HOOBALKA WADDANIGA AH QAASIM HILOWLE «Iskiifo»

Hoobalka waddaniga ah Jaalle Qaasim Hilowle oo ku magac dheer «Iskiifo», wuxuu ku dhashay magaalada Xamar, taariikhdu markay ahayd 1923kii. Jaalle Iskiifo aabbihiis wuxuu ahaa doonyowashire baxaari ah oo kalluunka ka dabta xeebaha Soomaaliya.

Xeebaha bariga Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, intooda badan kalluun buu ka daban jirey. Boosaaso, Iskushuban, Qandala, Hobyo iyo Xaafuun, Kismaayo, Baraawe, Marka iyo Muqdisho waa laga wada yiqiin. Hilowle wuxuu kaloo kalluunka u dhoofin jirey magaalooyinka xeebaha Yamanta Koofureed. Wuxuu dhoof ku tegey Mukulli, Xadramowd iyo Shixar. Aqoon badan iyo waaya'aragnimo wacan ayuu ka helay Hilowle dalalkaas oo dhan. Safarradiisa ayuu Hilowle wiilkiisa Qaasim uu uga sheekeyn jirey sida dadka Afrika loo gumeysan jirey. Noloshiisii hore, Qaasim wuxuu ahaa geedaqore, kaddibse, wuxuu u bayray dhinaca fanka iyo heeso tiriska. Shaqada fanka wuxuu bilaabay isaga oo weli dhallinyaro ah, hase yeeshee, waayihii gobonnimadoonka ayuu magiciisu sare u soo baxay, xiddigtiisuna ka muuqatay naadiga Kulanka Dhallinyarada Soomaaliyeed (S Y L).

Kulanka Dhallinyarada Soomaaliyeed oo markaas u halgamayey gobonnimada dalka ayuu ka mid noqday. Jaalle Qaasim Hilowle waa hoobal aad iyo aad waddankiisa u jecel.

Heesihiisu waxay u badan yihiin heeso waddani ah oo dadweynaha qiiro gelin jirey, haddana geliya. Kicitinka iyo baraarujinta dadweynaha ayay heesihiisu qayb libaax ka qaateen. Codkii iyo gurxankii uu xornimada dadweynaha ugu baaqayey waxay ka soo baxayeen maskaxda iyo waddaninnimada hufan ee Qaasim Hilowle. Waayihii gobonnimadoonka dad badan baa dusha ka qaybay heesihiisa waddaniga ahaa. Heestiisii ugu horreysey waxay ahayd midda caanka ah, sidii uu nagu yiri: «Soomaaliya!...... Soomaaliya!...... Soomaaliya ha noolaato!.........».

Habeyn kasta heestaas waxa laga qaadi jirey naadiga Kulanka Dhallinyarada Soomaaliyeed. Carruurta, odayaasha, hooyooyinka iyo horseedkuba dhammaan way u riyaaqi jireen markay maqlaan heesaha hoobalka Qaasim Hilowle. Heestii kale oo ku xigtey waxay ahayd:

« Dhallinyara Soomaali way dhaaratay
Dhulkooda dhawaaqiisa yay dhibsadeen
Dhug yeesha dhammaantiinna isdhiirriyaa
Nimaan dhiig lahayn waa laguu dheelaya!».

Heesta kale oo caanka ahi waa:

« Aaruurkeen iimaakeen
Aardigeennaan ku adkaanayaa iimaankeen
Aan is aruursannoo! aan is aruursanno a.... aaruurkeen! ».

Midda kale waxay ahayd:

« Saacad baa imaan!........ Saacad baa imaan!
Saacad baa imaan!....... Saacad baa imaan!
Safkood niman ahayn see....... eef bay marinhayaan!.....
Saacad baa.........».

Taariikhdu markay ahayd 1956-kii dabayaaqadeedii ayaa gumeysigii cusbaa faraha la soo galay Kulankii Dhallinyarada Soomaaliyeed. Markaas ayuu madax-dii xisbiga isku diray. Markaasaa xisbigii dad ka go'ay. Waxaa la dhisay 1958-kii xisbi kale oo la yiraahdo «Great Somali League» (Ururka Soomaali Weyn).

Wuxuu Qaasim horay u tiriyey heeskan, iyadoon weli xisbiga cusub la furin isagoo Raadiyaha ka shaqeeya. Warkii xisbiga baa heeskii daraaddiis shaqada la-gaga saaray.

Heestu waa:

« Galab walba waxaan...... hooyo!
galab walba waxaan...... aabbe!
galab walba waxaan u gaardiyeynnaa!
gefi maynno «Greatkaa» Soomaaliya!.

Intii ka dambeysey dhawr jeer baa siyaaso hadba shaqada inta lagu celiyo haddana laga saarayey.

Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii markii uu dalkeenna ka dhashay oo uu hoobalku ogaadey isbeddelka dhacay, buu u guuxay oo taageeray. Hees uu ku taageerayey kacaanka Oktoobar, iyo hantiwadaagga wuxuu yiri:

« Hantiwadaaggu waa wax hore loo bartoo bartoo
ha loo hiraashoo hantida dalkayaga dadweynahoo
hawl iyo hantiwadaagga dhammaanteen ha loo halgamoo ».

Heesaha Qaasim Hilowle ma yara intaas baanse ka soo qaadnay.

*Shire J. Axmed*

# SOOMAALIYA HORUMARKEEDA DHAQAN GALAY

Soomaaliya way socotay, dibna u soo laaban mayso. Heerka ay ka gaartey horumarkana waa mid la wada ogsoon yahay. Dalalka gumeystaha necebina, way ku ammaanayaan dalkeenna heerka wanaagsan oo uu muddada yar ku gaarey xag kasta oo loo eego, intii saddex, afar sannadood ah!

Haddii aynnu taariikhda dib u raacno, waxaynnu wada ogsoon nahay haddii aynnu nahay dadweynaha Soomaaliyeed, yar iyo weynba, in Soomaaliya toban sannadood ka luntay.

Geesiyaashii ummadda Soomalidu awooddoodii iyo kartidoodii waxay kaga saareen dalkooda gumeysigii uu ku jirey, naftoodana way u hureen.

Dadkaas halqabsigoodu wuxuu ahaa «GOBANNIMO» aan loo kala harin rag iyo haween baana u dacarreeyey gumeysigii ka yimid dhawrka kun oo mayl. Geesiyaashii caynkaas ahaa weli ma ayan helin abaalgudkoodii oo waxaa lagu abuuray caloolxumo iyo niyadjab. Umuurahaasna waxaa keenay oo ugu wacnaa dawladihii hore oo musuqmaasuqa ahaa ee dalka maamuli jirey oo dan oo itaal moodey qaraabakiil, eexasho iyo kd. Sidaas bay danahooda ku fulin jireen, waxay doonaanna way meel marin jireen siyaasadaas, iyaga oo danihii dadweynaha iska indha tiraya, xilna aan iska saarayn. Waxaa haddaba isweydiin leh, umnuuraha caynkaas ahaa maxaa beddeley?....... Jawaabtu waxaa weeye oo dadweynuhu wada xusuusan yahay, in Kacaankii Oktoobar 21kii, 1969 uu beddeley waxyaalihii xumaa. Dalkeenna iyo dadkeennaba waxaa u curtay hogol roob ah oo u da'dey, dhibaatooyinkiina ka furatay. Dadkeennu isaga oo isku duuban oo ka biskoodey caloolxumadii iyo qulubkii buu u riyaaqay kacaankii markii uu inoo dhashay. Gumeystihii iyo intii la socoteyna waxay ku hoogeen, markii la ciribtiray, lana dabar gooyey waxyaalihii danaha u ahaa ee gaashaanka iyo dhufeyska uu ka dhigan jirey. Sidaas ayaa dadweynihii Soomaaliyeed ee ciilka iyo tiiraanyadu ay heeryada dul dhigatay ay yididdiilo iyo niyadsami, gobannimo jacayl iyo waddaninnimo ugu soo noqotay!

Dabadeed waxay muujiyeen kartii iyo awood iyagoo garab taagan mabdaeenna ah hawl iyo hantiwadaagga cilmiga ku dhisan ee aynnu doorannay, horumarkana inoo horseedaya. Sidaas darteed, dadweynaha Soomaalieed waxay bilaabeen, sidii ay dhismaha dalka u daryeeli lahaayeen, hawlihiisana wax ka qabashadoodana u hirgelin lahaayeen, iyaga oo heegan u ah horumarinta dalka iyo dadkaba!

Dadweynaha kacaanka ahi wixii uu dalka u qabtay way ka muuqdaan xag kasta oo loo eegaba. Dadweynuhu wuxuu heegan u yahay, sidii uu waagii beryaba hawl aan kala jooggsan u wadi lahaa, isaga oo la kaashanaya maskax caafimaad qabta iyo hawlkarnimo ku dhisan waddaninnimo iyo midnimo tawri ah!

Afartii sannadood ee uu Kacaankeennu dalka maamulkiisa hayey, haddii aynnu isweydiinno: «Maxaa la qabtay?».... Waxaynnu dhidhi karnaa, inaynnu gaarney heer wacan oo leh horumar aan la soo koobi karin. Balse aan tusaale u qaadanno waxyaabahan:

— Nabadgelyadii guud oo dadweynaha Soomaaliyeed oo sugnaatay, taasoo keentay in maanta lagu wada dhaqmayo walaaltinnimo, sinnaan aan hore u jiri jirin, ugana dhici jirin dalka iyo dilkii iyo boobkii oo la dabar gooyey. Waxaa kale oo guul wacan aan ka gaarney xagga dhaqaalaha, kaasoo ku yimid muruqeenna, markii aynnu isku filnaysiinnay iskuna daryeelnay dheeftiisii.

— Tacliinta oo laga qaaday tallaabooyin xoog leh, middaasna waxaa caddaynaya qoraalkii afkeenna hooyo ee muddada dheer gumeysigu hor joogey iyo sida uu deg deg ugu hirgalay oo looga shaqeeyo maamulka dawladda, intaas keliya ma ahee afkeenna hooyo waxna waan ku akhrisanna waxna ku dhigannaa, dadkeenna rag iyo haweemba wuxuu ka xooroobayaa qoris iyo akhris la'aanta! Isla markaasna dhaqankeennii hore u lumay ayaa soo noolaanaya!

— Waxaa kale oo aynnu wada ogsoon nahay, in dalkeenna laga haqabtiray dhismihii uu u baahnaa oo uu heerka arrintaas ka marayaa uu yahay mid lixaad leh, iftiinkiisuna ummaddeenna u baxayo una sii muuqdo. Miraha dalkeenna sida aynnu uga faa'iideysanno ee loo tixgeliyey beeraha, hawlohoodana loo daryeelay waa wax qof walba u muuqda. Waayo, dad kuma noolaan karo dalkiisa, haddii aanu la soo bixin mirihiisa. Lama tirin karo waxyaalaha laga qabtay Soomaaliya intii kacaanku inoo dhashay. Sidaas darteed ayay Soomaaliya u gashay halgan cusub oo ay kula dagaallamayso cadawyada u waaweyn adduunka ee ah: Cudurka, gaajada iyo jahliga. Soomaaliya waxay tiigso isleedahay, sidii ay ku gaari lahayd barwaaqc loo siman yahay!

*Cumar Cabdi Xargeeye*

# XIRIIRKA KA DHEXEEYA KACAANKA WADDANIGA AH IYO DHAQDHAQAAQA GOBANNIMADOONKA AH

Sida la ogsoon yahay kacaan kasta oo waddani ihi wuxuu ka dhashaa qarax ka yimid ummad caradeed, kaddib markii ciriiri laga gasho nolosha dhinac kastaba. Sidaa awgeed kacaanku waxa weeye wax ummadi ku raadiso wixii ay jid ugu lahayd nolosha.

Kacaan kasta oo waddani ihi kama maarmo inuu burburiyo taliskii gaboobey ee hore, xididdadana u rujiyo rukun kastuu ku taagan yahay. Markaa dib ummadda waxaa la gudboon inay ku dhaqaaqdo dhismo cusub oo ku saabsan, xagga siyaasadda, xagga dhaqaalaha, dhaqanka, suugaanta iwm., si ay dhaqso u gaarto nolol barwaaqa ah.

Haddii aan u laabanno xaggan iyo dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka ah ee dalalka weli la gumeysto waxaan garan karnaa ujeeddadiisu inay tahay sidan hoos ku qoran:

1) Gumeysiga oo dalka laga saaro.
2) Madaxbannaani siyaasadeed oo la helo.
3) Qarannimo buuxda oo la gaaro iyo
4) Nolol barwaaqa ah oo ummaddu ku waarto.

Intaa dabadeed, waxaa inoo caddaaday in ujeeddada labada guuto (kacaanka waddaniga ah iyo dhaqdhaqaaqa gobannimodoonka ah) ay mid isku tahay; qarannimo ummadeed oo buuxda, iyo barwaaqo waarta, leeyihiinna nacab qura oo kala midab ah, hase yeeshee isku dan ah; gumeysi iyo dibusocod.

Shaki wuxuusan ku jirin haddii labadaa guuto midkood guul darraysto — midka kale inuusan ka sed roonaanayn. Labadaa guuto een horay ku soo sheegnay iyaga oo meel qura ka soo jeeda, waxay la bohoobaan beesha weyn ee ka kooban:

Taxanka hantiwadaagga ah, dabaqadda xoogsatada ah ee dalalka hantiwadaagga ah, xoogga ballaaran ee horusocodka ahi, wuxuu ka hor jeedaa, xoogga dibusocodka ah ee ka koobma: Imberiyaalistaha, gumeysiga iyo dibusocodka.

Sidaa run ahaanteeda waxaa sugay taariikhda iyo waaya aragtida. Haddii aan u fiirinno xaggan iyo kacaankii waddaniga ahaa ee Soomaaliya u curtay 1969kii, waxaan xusuusan nahay qodobkii ku yimid xaashidii koowaad ee kacaanka. Kaasoo ahaa; kacaanku wuxuu isgarab taagayaa dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka ah, hiil iyo hoona waa u hurayaa. Nasiib wanaag kacaanku wuxuu qaaday tallaabo weyn waa dhinaca taariikhda adduunka haddaan dib ugu laabanno. Waxaan iyana ka helaynnaa wax ka marag kacaya hawraartan. Taa waxaa ka mid ah, kacaankii waddaniga ahaa ee dalka Masar 1952, dii Kuuba 1956, kii dalka Aljeeriya 1954, kii Fiyatnaam 1946, ugu shishayn ka-

caankii weynaa ee hantiwadaagga ahaa ee dalka Midawga Soofiyeeti 1971kii iyo kii Shinaha Dadka 1949.

Giddigoodba intaasoo kacaan oo horusocodihi, iyo wixii la mid ahiba waxay qireen in dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka ahi yahay xubin halbawle ah, oon looga maarmi karin halganka lagu raadinayo gobannimada, horumarka nabadgelyada caalamiga ah.

Inkasta oo xooggii weynaa ee gumeysiga goobjoogga ahi ka baxay Asiya iyo Afrika, haddana taasi waxba hoos u ridimeyso qiimihii dhaqdhaqaaqu ku lahaa safka horumarka iyo nabadgelyada jecel ee adduunweynaha. Maxaa yeelay, gumeysigu weli wuxuu hayaa dhul badan oo Asiya, Afrika iyo Bariga dhexe ka mid ah, waxayna yihiin: Koofur Afrika, Naamiibiya, Roodiisiya, Afrikada Burtiqiisku haysto, Xeebta Soomaaliyeed, Falastiin iwm.

Waxaan hadalkan ku soo koobeynnaa dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka ah ee dalalka weli shisheeyuhu gumeysto waa waxaan ka gooni noqon karin xoogga horumarka iyo nabadda jecel, isla markaa waa xubin ku xiriirta kacaanka waddaniga ah ee dalalka ina habreedka yihiin, kuwaasoo ah: Asiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika.

*Jaalle Cabdillaahi Ardaye*

## GO'AANKII MUQDISHO (1971)

Markii Oktoobar 18-20kii, 1971, Muqdisho ay ku shireen madaxda Afrikada Bari iyo Afrikada Dhexe, khudbaddii uu ku furay Jaalle Siyaad Madaxweynaha G.S.K., wuxuu af buuxa ku yiri Jaalle Siyaad khudbadiisii uu ka akhriyey Oktoobar 1971, shirkii Afrikada Bari iyo Afrikada Dhexe: «Waad og tihiin waxaa Bortuqqiisku ku laynayo dalalka uu weli gumeysto. Waa hubkii NATO. Dawladaha Nato ku jiraa haddaba, ma isku sheegi karaan, inay yihiin saaxiibbadii dadka Afrika? Ma isaga kaaya dhigi karaan, kuwa taageera gobannimada Afrika? Innaguse ma rumaysanaynnaa, markay sidaa ku doodaan, haddii ayan danba ka lahayn dadka la dabargoynayo, ama la midabtakoorayo oo ay ku taageerayaan hub ciiddeer oo kala ah, si uusan Afrikanku gobannimo iyo sinnaan weligi il u saarin? ».

Xagga hiddaha iyo dhaqanka shirku intuu socdey, ama isla markii la bilaabay durba, waxaa yaab lahaa oon la illoobi karayn qaybtii dhanka suugaanta, waxaa ka mid ah heesaha caanka ah, oo uu tiriyey Jaalle Cali Cabdullaahi «Sangub» «Yan Smiid» iyo «Afrikay Isburo» oo uu tiriyey Jaalle Cali Diiriye.

## YAN SMIID

1. Yan Smiid ma muuqdeen Roodiisiya ma maageen haddaan midig la siinnin;
Bortuqiis ma mariyeen mana uu malaysteen Mosambiik Angola;
middiyihii qarsoonaa...... Geni lagu miraayey

...... Suud Afrika ma moogin;

Hadal iyo murti lahaw Afrikaay ismaqaloo
midabgumeysi diida, diida, diida, diida.

2. Dadka oo midooboo kulligii masooba nabad lagama maarmo;
maalintay xumaatee ragga aydin murantaan warankuna macaan yahay;
madowgaaga kaan rabin, ninkaan.........
muuqaaga kii neceb, ninkii...........
kiisana ha meel marin.

3. Haddii aan maskaxi talin dhegtu maqal xumaha jira
ishu maalin aragtii luguhu hawsha maamulin
gacmuhuna wax kuu qaban cadow kaama maato
midabkuba sed weeyee..........
magucuba dan weeye..........
murtidu dhaxalgal weeye..........

4. Madaxdii Afrikaay mabdi'ii gumeysigu magacood be' wuxuu yahay
wanka macasha ii qabo, adigu gawrac ii mari dhiiggana an muudsado;
sirtii aad ku marateen........
«maya» haddaad tiraahdaan.......
Ma afkaa maroorsami
Hadal iyo murti lahaw Afrikaay ismaaqaloo
midab gumeysi diida, diida, diida, diida.

## AFRIKAY ISBUUROO

Heesta kale waxay ahayd heestan oo uu tiriyey Jaalle Cali Diiriye, Caligaab.

1. Israa'iil ma boodeen Bari dhexe intuu dego
birta kuma afaysteen, waa boqol Yuhuudiye
rag baa biirinaayoo baarka u firaayee
barqo laguma gaareen.
Badda kuma ciyaareen; barbaarrada ma laayeen;
Haddaan muruqa buuxiyo isticmaar ku baal jirin,
oon bayda u garaacayn; waa bahal gumeystuhu
kala baahsanaantiyo baylahdaada jeceloo
markuu baadka kula helo; kaa bogan qaniiyadoo
burka kuu dhex gelayee

bushimaha dushoodiyoo been weeye nabadduye;
baaruudda qiiqdiyo buntukh weeye duniduye;
Afrikay isbuuroo isa soo bahaysoo;

ninka baal u leexdana basar wax ugu sheegoo ku ballama dagaal.

2. Israa'iil ma boobeen, Carab uma bareereen
nabad kuma bariisteen baydkii Ilaah iyo barxaddii
Rasuulki waxaan loo bannayniyo baqti kuma dhex kariyeen

Kaaramu muma burburiyeen bili kuma ciyaareen.
Waa kacaan hantiwadaag ah iyo dhaqan kacaan ah — waa ujeeddo qur ah.

Dadkii Afrika ee gobannimada u halgamey oona kacaannimada runta ah aamminsanaana, meel ay joogaamba adduunka aad bay ugu diirsadeen oo ugu riyaaqeen orohdaa cad oo ka soo yeerta madaxweyne Afrika ah.

Soomaali ahaan, afkii laynagu bartay oo shirtarka adduun shalaydii ka horreeysey laynaga maqli jirey iyo tani waxay isu noqdeen kaaf iyo kala dheeri.

Haddaanse la ogeyn in kacaan hantiwadaag ahi uu ka dillaacay Soomaaliya waaba la dhakafaari lahaa....... «meesha lagu shirayaa Soomaaliya ma ahee bal ha la hubsado» nabee inay is oran lahaayeen.

Waa gartood! Dad uun hiddeheennii iyo dhaqankeennii aan hore ula socon illaa waa la kala daboolaye intaa 60kii ka dambeyseyna fagaara kasta waxa aan la tagno rag ogaa saw inuu u qaadan waayo afka gacanta saaro marka hore gartiis ma aha!.

Shirkii aan u soo noqdee go'aaankii muxuu noqday? Go'aan cad oo dunida, saaba Afrika magac weyn ku yeeshay xoog iyo geesinnimo oo kacaannimo ahna geshey u dagaallanka gobannimada Afrika, oo loo bixiyey: «Go'aankii Muqdisho» oo dulucdiisa koobani ay tahay: «Talo kaloo lagu xorayn karaa dhanka Koofur Afrika ma jirto dagaal hub loo qaado ma ahee, taas oo aan horaba garab u ahayn haddana aannu mid buuxda siinaynno». Waxay noqotay markaa mabda' siyaasi ah oo cad oo lagu ballamay ee aan ku xirrayn «markay aniga ila noqoto».

Hantiwadaagga runta ah oo aynnu qaadannay iyo hiddihii iyo dhaqankii uu soo nooleeyey baa suuragal ka dhigay in shirkaasoo kale ah Muqdisho lagu qabto; in orohdeennu caddaato; in go'aankiisu noqdo: «Go'aankii Muqdisho».

## MAGACYADA SHISHEEYE EE AFKEENNU SOO AMAAHDAY

Sida la wada og yahay, afafku erayada way kala amaahdaan. Maxaa yeelay afna keligi gooni uma istago isagoo wax soo amaahda mooyee!

Afkeenna hooyo erayo qalaad ayaa soo galay. Erayada Afkeennu soo amaahday waxay u badan yihiin erayo ku saabsan farsamada( technology), maamulka (administration) iyo sharciga.

## ERAYADA AF CARABIGA INOOGA YIMID

Erayada Af Carabiga inooga yimid way fara badan yihiin. Iyagu waxay u badan yihiin dhinaca Diinta islaanka kuwo la xiriira. Haddii aynnu fiiro dheer u yeelanno, waxaynnu ku aragnaa erayadaasi inay u badan yihiin dhinaca sharciga iyo dhaqanka. Bal aynnu wax taataabanno.

## DHINACA SHARCIGA IYO DIINTA ISLAAMKA

ERAYADA: khayr, shar, ciqaab, xaq, xaaraan, xalaal, janno, cadaab, dulmi, caddaalad, kitaab, nikaax, meher, waalid, raasumaal, ceeb, fadeexad, sharaf, ra'yi, figrad, hindso, miskiin, taajir, sadaqo, salaad, caafimaad, cadow, soon, hakhayl..........

## DHINACA NOLOSHA DUGSIGA

ERAYDA: Qalin, khad, warqad, khaanad, miis, kursi, edeb, dabeecad, xisaab, xirfad, fasal, sadar, asluub, aasaas, fan, ficil, amar, iyo kuwo kale oo badan ayaa ku soo arooray afkeenna hooyo!

## DHINACA DHAQDHAQAAQA GANACSIGA

ERAYADA: inkirid, miisaan, kafad, rodol, jawaan, wiqiyad, saacad, ijaar, dukaan, maqsin, timir, bun, casho, qado, albaab, wakiil, wakaalad, shardi, akhris, fallis, cuud, catar, makhaayad (maqaayad), malgacad, saxan, markab, shiraac, shixnad, jubbad, shahaado, iyo erayo kale oo aad iyo aad uga saameeyey afkeenna dhinaca dhaqaalaha iyo ganacsigaba ayaa ka buuxa afkeenna hooyo.

## ERAYADA AF TALYAANIGA IYO INGIRIISKA INOOGA YIMID

Dhinacyada uusan Af Soomaaligu hore uga kicin, waxaa ka mid ah, dhinaca farsamada cusub iyo maamul dawladeed. Arrintaasina waxay ku xiran tahay, in Afkeennu uu la socdey heerka aan farsamada iyo maamuka dawladdeed ka joogney! Heerkaas oo ahaa mid aad uga hooseeya, haddii aynnu fiirinno dawladaha farsamada iyo sancada hore ugu kacay. Isagu wuxuu ahaa heer reerguuraa ah oo leh dhaqankiisa! Fakarka iyo hindisaha afku waxay hadba ku xiran yihiin heerka dhaqanka oo dad kastaa marayo. Sidaas daraaddeed, ayay Afkeenna ku yar yihiin eraybixinta ku saabsan farsamada, sancada iyo maamulka dawladeed. Haddii ay taasi dhacday oo laga waayey Afkeenna erayada qaarkood oo ku saabsan waxy-

aalaha aan hoos ku sheegnay, waxaa habboonaatay, in laga soo amaahdo erayada farsamada (technical words) afafka shisheeyaha ah ee xiriir taariikh ihi na dhex maray. Waxaa dhacday, in eraydaas qaarkood lagu qaatay sidii ay inoogu yimaadeen, iyagoon waxba laga beddelin in yar mooyee!

Elletirijistaha, makaanigga, matooristaha, farmashistaha, muusikistaha..........
Sida aan halkaan ku caddaynnay, waxaa ka muuqday inaan u baahan nahay

erayada dhinaca farsamada iyo sancada cusub oo dawladuhu xoogga iyo horukaca ku gaareen! Erayada «Laatiinka» inoo ka imaanayaa oo ku soo qulqulaya Af Soomaaliga - siiba dhinaca farsamada way fara badan yihiin, waxayse u baahan yihiin in la toleeyo.

## ERAYADA XIDDIGATIRISKA OO TOLOOBEY

Erayada xiddigatiriska oo Af Carabiga nooga yimid way badan yihiin. Kuwaas waxaa ka mid ah; Maalmaha, saacadaha, sannadaha iwm.

— Sabti-da, Axad-da, Isniin-ta, Talaada-da, Arbaca-da, Khamiis-ta, Jimca-ha.

— Saacad, daqiiqad.

— Sannad, qarni iwm.

Erayada xiddigatiriska oo Af Talyaaniga iyo Af Ingiriiska inooga yimid oo aynnu sidoodii ku dhaqan gelinney waxaa weeye bilaha qorrexeed:

Jannaayo, Febbraayo, Maarso, Abriil, Maajo, Juunyo, Luulyo, Agoosto, Sateembar, Oktoobar, Nofembar, Diseembar.

# TAARIIKHDA IYO GABAYGA

Taariikhdu waa sheekoo aqoon ku dhisan oo lagaga warramayo dunida guudkeeda wixii horay uga dhacay, wixii jiri jirey ama ummadihii ina ka horreeyey noloshoodii, horumarkoodii, ilbaxnimadoodii, xeerkoodii, iyo sidii ay u horumareen, dibdhacoodii iyo wixii ugu wacnaa ama raggii dunida guudkeeda magac iyo martabadba ku yeeshay iyo waxay qabteen oo markaa wixii wanaagsanaana looga daydo waxay ku xumaadeenna laga leexdo.

Gabayga Soomaalidu waa hadal taxan oo xaraf iyo xeer uu leeyahay raaca, deelqaafka iyo delidhacayntana laga ilaaliyo, had iyo jeerna waxaa keena wax qofka hiyi kiciyey oo maskaxdiisa iyo qalbigiisa walaaqay, hiyikacaasiba ha ahaado wax qofku qaadan waayey oo xumaan ku lug leh ama ha ahaado wax uu jeclaaday oo wanaag ku leh oo markaa uu doonay inuu wax ka sheego, markaana waxaa lagama maarmaan ah inuu qofku gabayga mariyo. Wax aan ka tusaaleeyo waxyaalo taariikh ah oo horay u dhacay lana mid ah waxaa hiyi kiciyey. Markii gabayga lagaga warramaayo wax dhacay iyo sidii ay u dheceen ama lagaga digaayo wax la filaayo, inay dhacaan ama lagu tirtirsiyaayo wax la doonayo inay dhacaan waxaa wax lagaga sheegaa ujeeddadaa wax la mid ah oo la soo dhaafay.

Gabaygu waa hadal uusan qof waliba awood u lahayn inuu tiriyo. Haddaba, markaynnu isweydiinno oo niraahno: Taariikhda iyo gabayga xiriir ma ka dhexeeyaa? Waxaynnu oran karnaa: Haa, waxaa ka dhexeeya xiriir weyn.

Gabaygu wuxuu dhawraa taariikhda, iyaduna waxay ka warrantaa gabayga, ninkii mariyey iyo ujeeddadiisa. Aan halqabsi ka dhiganno gabaygii Saiyd Maxamad Cabdille Xasan oo ka bilaaban jirey.

Xuseenow aqligu kaama boxo idan Ilaahay e wuxuu yiri:

Nimankii isaayaha dhigee dunida aafeeyey
Oo Aw-Cabbaas diley dadkoon eedi kala gaarin
Oo uunka kala fiijiyee kala irdhaysiiyey
Oo yiri Amxaarannu nahay Adarina u guurey
Oo MILILIKH aabbe u yahee u arrin qaadaayey
Oo Xabashi eygi u noqdee u ololeynaayey
Ingiriiska nimankii wadee nagu asiibaayey
*Afbakayle* nimankii kufriga uraya ii keenay
Oo *Oodaggooyiyo* i dhigay aydi *Daratoole*
Nimankii ikhwaankii jaree aabiga u laayey
Ragga ehlukhayrkaa warmaha kala ajoon waayey
Oo umal daraaddiis girliga nagu afuufaayey
Idilkoodba nimankii dagaal noogu imanayey
Nimankaan inkaaree madfaca ololi noo haystey
Ee ubaxcaddaydii hartiga oofta kaga joojey

Nimankii iniinaha ka dhigay *Ilig* wixii joogey
Ee *Eeraggoo* iyo *Batala* nagu uquumeeyey
Ee omoska *Beerdhiga* tukaa nagu ormeysiiyey
Nimankii ayaantii *Gumburo* obo'da noo dhiibey
Ardaashii *Jidbaale* i heshee igu unuun goysey
Nimankii uluuf iyo uluuf igu agoomeeyey

..................

Utuntayda waan heli haddaan iilka lay dhigine
Araraha intaan marahayay igu arkaayaane
Mar uun baan sidii aar libaax oodda soo jebine

..................

Gabaygaa dhexdiisa Sayidku wuxuu ku sheegay toban goobood oo Daraawiish iyo Ingiriisku ku dagaalla meen iyo sidii ay u dheceen. Haddii gabaygaa iyo laysu eego buuggii uu qoray Jardine oo dagaalladaa raggii ku jirey ahaa, magicii-sana la yiraahdo: «Mad Mullah of Somaliland», waxaa muuqanaya inay si wax u wada sheegayaan. Waxaa, haddana caddaan ah gabayga iyo taariikhda in xiriir ka dhexeeyaa oo ayan kala maarmi karin sida midkaani uu taariikhda uga warramayo.

*Sheekh Jaamac Cumar Ciise*

## KACAANKA OKTOOBAR WAA BAAQ QODDO DHEER!

Dable Cali Cabdi Magan waa gabyaa kacaan ah. Gabayadiisu waxay ka soo hor jeedaan dibusocodka, gumeysiga cusub iyo xoogga imberiyaalistaha adduunweynaha. Isagu gabaygaan wuxuu ku taageerayaa xaqa, caddaaladda, sinnaanta, wuxuuna ku cambaaraynayaa gabaygiisa dhiigmiiratada, hantigoosadka iyo dabadhilifka gumeysiga, afmiishaarka iyo cadawga Kacaankeenna oo inoo dhashay 21kii Oktoobar 1969, ee ay horseedayaan Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, iyo Kaaliyayaashiisa ku jira Guddiga Golaha Sare ee Kacaanka iyo waxgaradka ummadda Soomaaliyeed, shaqaalaha, ciidammada salabka sida, beeraleyda iyo xoolo dhaqatada Soomaaliyeed!

Tixahan gabayga ahi, waxay ku saabsan yihiin Kacaankii Oktoobar oo baaqa dheeraa. Jaalle Dable Cali Cabdi Magan wuxuu gabay ku yiri:

Kacaankii inoo dhashoon dhiigba lagu daadin
Adduunyadu dhammaanteed qirtoo dhaxalgal weeyaane
Dhulkiyo cirkaa wada ogsoon dhayrki uu dhalaye
Murtidii Siyaad noo dhigiyo dhaxallay guushiiye
Dhalanteed ninkii moodayow waa dhab tawradduye
Fikrad dheer inay leedahaan dhaar ku marayaaye!
Anaa idin ka dhaadhicinayee dhego u soo yeesha
Waa shaqaalaha intaa dhimanayee dhididka maalaaya
Waa kuwa iskoollada dhigtee dhabarku boogoobey
Waa ciidammada dhaarsanee gama' ka dheeraaday!
Waa kuwa jabsada dhagaxa ee muruqa dhuuxaaya!
Waa ciidda kuwa kala dhambala dheellidiyo beerta
Waa kuwa kalluunkiyo ku dhaqan badaha dhoofkooda!
Dhinac kale haddaan fiirinnoon dhaqanka faallaynno
Gabdhihii ku dhiman jirey haddaan dhoollo ka caddeeyo
Saddexdii dhudood boqorka ay dhab ugu laafyooto!
Dhaaclihii la qaadan jiriyo khaylidiyo dhuugga!
Kabo wada dhalaaliyo dhawr go' oo quruxsan
Kuushii hiddaha laga dhaxloon laabta kor u dhaafin
Masar siiga dhawroo timaha lagu dhaqaaleeyo
Dhoorkii la heeraari jirey dhawr saniyo saa'id
Dhalo subag ahoo gooniya dhaashigii subagga!
Dharkaasay kurtood xiran jireen dhaqanka weeyaane
Dhanna umay seexan jirin duhur dharaareede!
Dhagta waaga bay kici jireen dhaxan arooryaade!
Qabo aad u dheer iyo argeeg dhiilo laga suubsho
Dhulkay maar ka soo guran jireen mayrax dhacadiidda!
Dhalasaarka dheegfuulka iyo weerka dhinac yaalla
Dhigdhaxada dhagaatiga biraha dhiisha iyo looxa!

Dhuure iyo fandhaal dheriga xeero dhacadiidda!
Gogol saxarki laga dhawray iyo toolane dhiidhiiya
Raro dhawr sambala bay markaas dhab u sameeyaane
Haddiise guur dhadhamo kaa gashood hadal u soo dhiibto
Jidka kuguma dhaafaan inay kugu dhawaaqaane!
Dhawr sano adoon raadinoon dhiiggu kugu joogsan
Dhayal uma heli jirin ninkii dhudi jeclaadaaye!
Haddiise meher kuugu dhaco oo calafku kuu dhiibo
Iyadoon ninnaba dhawriniyo booyiso u dhaamin
Iyadoo adduunyada dhaqdoon dhididka diideynin!
Iyaddoon masruuf kugu dhibeyn beeso ay dhigato
Iyadoo dhashii nuujisoo dhabarka saaraysa!
Ayay dhawrsanaan dumar lahayd sharafay dhawrtaane!
Kuwa dhumay haddaan fiirinnana dhimasho weeyaane
Dhoobay lugaha kula jiraan dhaqan shisheeyaade!
Toob saracda dhaafsiisanoo dhuunta kala jeexan
Kabo taako dheerliyo ciddiyo dhiig la soo mariyey!
Dhiirdhiiskaa socodka iyo baarka laga dheelo
Boorso dhinaca lagu qaato iyo suuq la dhalandhoolo
Madax dhalada loo fiiqay iyo naaska dhinac qaawan!
Diintuba waxay dhaaftay bay dhinaca haystaane
Dhinac kale haddaan fiirinnoon nimanka dhayruufno
Kuwii dhaqanka hayn jirey haddaan dhuuxa ka caddaynno
Shanley faraqyo dheer iyo maryaha quruxda loo dhiibey!
Billaawaha dhankaa midig ku xiran waran dhalaalaaya
Gaashaan jilbaha loo dhigiyo geesinnimo dhaarsan
Awr dhebile nirig dhalatay iyo dhoobir lagu raaco
Dhakal caano lagu kaydiyey dhab u yaqaanniine!
Oo way ku dhaadani jireen dhaqanka weeyaane!
Kuwa dhumay haddaan fiirinnana dhimasho weeyaane!
Dhabbihii ibleyskey hayaan dhaqanki gaalaade!
Dhalanteedka iyo beenta bay dhab u maleeyaane!
Dhilladiyo khamaarkay intaa dhabar wareegaane!
Dhalo aalkoliyo biirahay dheef ka deyayaane!
Dhididkoodi iyo xooggey dhab u halleeyeene!
Dhabbaha iyo dariiqay sidii dhiriq u yaallaane!
Afartaa dhammeeyaye waxaan hadal ku soo dhaabay
Dhanna hawga bayrina waddada dhaqanka loo yeelay
Dharka saad u qaadani jirteen haysta dhalankiinna!
Iska dhawra diintuu qarbigu nagu dhex beeraayo
Ku dhintaay! hidduhu waa sharciga dhaxalgakiisiiye

## HANTIDAAN WADAAGNO

Kacaanka hantiwadaagga ah waxaa hor taagan dhibaatooyin badan.

Dhibaatooyinkaas waxaa ugu weyn maamul xumada, eexda, qaraabakiilka iyo musuqmasaqa. Inkastoo Golaha Sare ee kacaanku dadweynaha xumaha uga digey, haddana waxaa jira dibusocod aan marna dheg u jalaqsiin wanaagga iyo tusaalooyinka Madaweynaha G. S. K., dibindaabyana u geysanaya dadweynaha Soomaaliyeed, caddaalad iyo sinnaanina inay dhalato aan oggolayn. Tixdan waxay marag weyn u tahay waxyaalaha dadweynuhu gocanayo oo ka imanaya dhaqan xumada. Isaga oo ka faalloonaya dhibaatooyinkaas, gabyaaga caanka ah, Cali Xusseen wuxuu tiriyey «Hantidaan Wadaagno» 8-da Jannaaayo 1974. Wuxuu yiri:

Hantidaan wadaagniyo haddaan hawsha socodsiinno
Oo aad hirgalisaan mabda'a lagu hayaamaayo
In horumar laga gaarayaa bubanti weeyaane
Habarhabarta waagay ahayd habti la illaaaway
Haleelada irmaan iyo ninkii laga horweyn qaado
Wow hiillinayseen intaad hub u gurataane
Maxaa loo hagranayaa dhulkaa hugun u baahnaaye
Hayeeshe, waxaa jira mid aad shalay halmaanteene
Gacmaha hoorso gaalkii dantiinna u halleynaaya
Hidinmaayo caawimo ninkii shalay ku heesaayay
Wax ma heli karaan buu isyiri ku hawalkiisiye
Miyaan ficili idin hayn nin raga xumaanto hiinfaarye
Sida haan tigtigan oo furkiyo hilayga loo giijey
Calooshii higaagane dulmigu huurshay gudaheeda
Qabiilnimo afkii ka hirgashay oo uurka ka hugmaysa
Mid hangoolla dheer sidata oo heello tirinaysa
Yaa haatan lagu maamula hoobay shicibkiiye
Rag halyeey la mooday oo Goluhu hawl u kala dhiibay
Oo inay hoggaanshaan khalqiga lagu halleeynaayey
Oo dhaar hagaabaha ku maray inaan hanuunaayo
Oo hoosta ka xun aad dushana hanaddo moodayso
Oo harag shabeello huwan baa qodaya haadaane
Ninkii hilibka saa'ida bartaa waa u hamuumaaye
Waxay hibanayaan waa musuqa halabihiisiiye
Hadurkii u shuba been dadkoo heelka wada buuxa
Nin hagaagsan moodeen dantana ka highigoonaaya
Hagoog laba wejilaha cadowga u hadaafaya
Wakhti ay haleeshaba nabsigu wuu haraatiyiye.

# 21-KA JANNAYO 1973 WAA TAARIIKH AAN LA HALMAAMI KARIN

Maalinta 21-ka Jannaayo 1973, waa maalin weyn oo taariikh dalkeenna iyo dadweynaheennaba u leh, maxaa yeelay, waa maalintii Guddiga Golaha Sare ee Kacaanku go'aan ku gaaray, in laga dhaqan geliyo Afkeenna hooyo dugsiyada, maamulka Dawladda iyo dhaqankeenna oo idilba. Qorista iyo dhaqan gelinta Afkeenna hooyo, wuxuu inagu yahay waajib kacaan ah rag iyo haweenba. Maalintaasaa dadweynaheennu ka xoroobey xagga dhaqanka iyo fakarkaba. Sida la wada ogyahay Afku waa hubka keliya oo lagu dhowro, laguna diiwaaniyo suugaamaha iyo murtiyaha.

21-ka Jannaayo 1973, waa maalintii qarannimada Soomaalidu ay lugaha ku istaagtay, lagana aqoonsaday adduunka oo idil. Isla maalintaas, dadweynaheennu wuxuu bilaabay, sidii loogu taabbo gelin lahaa aqoonta adduunka taalla Afkeenna hooyo. Qoraalka Af Soomaaligu intaas oo keliya kuma ekaannine, haddana waxaa loogu isticmaalay kicinta dadweynaha iyo dhismaha hantiwadaagga cilmiga ku dhisan. Isaga oo ka hadlaya arrintaas, Madaxweynaha Golaha Sare ee kacaanka ee J. D. S. Jaalle Siyaad wuxuu yiri:

«...... Ma doonaynno in ummaddeennu u qaybsanto in yar oo warqadda isku afgarata iyo in badan oo hadal keliya wax isku gaarsiisa; mana doonaynno in ummaddeennu ay u qaybsanto in yar oo akhriska ku korisa aqoonteeda iyo in badan oo aragtideedu ku dhisan tahay wax garadkooda» (hadal uu Madaxweynuhu u jeediyey ummadda 7-3-1973). Maanta oo la xusayo sannad guuradii 1-ad ee dhaqan gelinta Af Soomaaliga, waxaa loo baahan yahay in la aruuriyo murtida dadkeenna oo soo jiri jirtey qarniyaal iyo qarniyaal, hase yeeshee, aan lahaan jirin wax qoran oo dib loo raaco. Maanta waxaannu awood u leennahay, in wax kasta oo ku saabsan aqoon, farsamo amaba cilmi aynnu dhaxal gal kaga dhigno Afkeenna hooyo. «Hadalku dabaysha ayuu raacaa, waxa qoranise, dhaxal gal ayay noqdaan». (Waa maahmaah giriig ah).

Dagaalka maanta ina la gudbooni wuxuu yahay, sidii aynnu u bari lahayn dadkeenna, sidii uu wax walba oo qiimo leh u qori lahaa, uguna kaydsan lahaa Afkiisa hooyo. Sidee Afkeenna si qumman loogu dhaxal gelin karaa? — waa weydiin meesha ku jirta.

...... Dukaanleydu waa inay ganacsigooda galeeyaan oo waxa soo gala iyo waxa ka baxa ay gal ku qoraan, kana dhigan ganacsigooda wax qaab loo raaco leh.

...... Makhaayadleyda iyo baararleydu waa inay xaashado ku qoraan cuntada iyo cabbidda ay haystaan.

Dawladda hoose iyo Wasaaradda Ganacsiga Guduhuba waa inay u furaan ganacsatada tababbarro ku saabsan maamulka ganacsiga gudaha dalka. Dhalashada iyo da'da carruurtana waa in lagu qoraa buug. Nikaaxa, me-

herka, furidda, arooska iyo geeridana waa in la qoraa oo loo yeelaa galal, laga akhrisan karo arrimahaas. Dhaqashada Xoolaha, iyo nafleyda kaleba, waa in loo sameeyaa hab lagu aqoon karo cudurradooda, tarantooda iyo wax alla wixii ku saabsan noloshooda oo dhan. Falashada beeraha dalkeenna, waa in wax laga qoraa, cudurrada geedaha, dhirta iyo cagaarka magacyadooda oo dhanna waa in la qoraa oo la ogaadaa nacfiga ay u lahaan karaan dadka-siiba dhinaca daawada.

Warshadaha iyo xurummada farsamada gacantu waa inay yeehsaan hannaan sahlan oo ka warramaya faa'idadooda, khasaaradooda, horukacooda iyo dibudhacooda mar walba. Hannaankaasi waa inuu leeyahay muddadiisa, meeshiisa (jagadiisa), jaadkiisa, heerkiisa iyo qabanqaabintiisaba. Goleyaasha Hanuuninta Dadweynuhu shaqadoodu ma aha oo keliya, inay khudbooyin keliya akhriyaan, illowse waa inay ka kaaliyaan bulshada dhinaca farsamada, si ay noloshoodu ku hagaagto kuna fududaato.

Sharciyada Dawladda, hawlaha maxkamadaha iyo arrimaha dhaqanka dadweynaha ku saabsan oo idil, waxay iyana ku habboon yihiin, in la qoro oo si ilbaxnimo leh loo habeeyo. War iyo dhammaantiis, dadkeennu waa inuu ka guuraa dhaqankii hore oo ku dhisnaa hadal aan qornayn ee dabaysha raaca. Dadku waa maskax, maskaxduna waa fakar, fakarkuna waa qoraal, qoraalkuna waa hawlqabasho.

*Faaliyaha «Kacaanka»*

# TUSMADA KACAAN

———«o»———


*Gogoldhigga Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare* Bog. *1*
*Jaangooyada Dhaqaalaha, V. I. Lenin* . . . » *2*
*Hawlihii Guddiga Af Soomaaligu soo qabtay* . . » *3*
*Soomaalida iyo ammaanta geela* . . . . . » *7*
*Rugta Kutubta (Library)* . . . . . . » *10*
*Dhugmo hoose u yeelo (Geeraar)* . . . . » *12*
*Akdeemiyaha Dhaqanku buugagguu daabacay* . » *15*
*Qorrax madoobaadka iyo dayax madobaadka* . . » *16*
*Xuskii Maxamed Cabdulle Xalane* . . . . » *17*
*Illoobimaynno taariikhda* . . . . . . » *20*
*Maahmaahyo hawlkarnimo ku saabsan* . . . » *21*
*Gabay ammaan ah* . . . . . . . . » *24*
*Halganka Carabta iyo gardarrada Yuhuudda* . . » *26*
*Buraanbur kacaan ah* . . . . . . . » *28*
*Cigaal shiidaad* . . . . . . . . » *30*
*Tartankii 1-ad ee suugaanta* . . . . . » *32*
*Soomaaliya (taariikh gaaban)* . . . . » *36*
*Cali Xuseen* . . . . . . . . . » *39*
*Fanku siduu ku bilaabmay* . . . . . » *41*
*Shineemo* . . . . . . . . . . » *45*
*Cabdulle Raage Daraawiish* . . . . . . » *47*
*Dhismaha iskaashatooyinka dhagaxa nuuradda iyo ciidda* . . . . . . . . . . » *49*
*Gabay kacaan ah* . . . . . . . . » *50*
*Gabyaagu qiimaha uu dalka u leeyahay* . . . » *51*
*Yaa hantiwadaag ah* . . . . . . . » *54*
*Sheekooyinka iyo riwaayaduha maxay kala yihiin* . » *55*
*Hoobalka waddaniga ah Qaasim Hilowle (Iskiifo)* » *56*
*Soomaaliya horuumarkeeda dhaqan galay* . . » *58*
*Xiriirka ka dhexeya kacaanka waddaniga ah iyo dhaqdhaqdhaqaaqa gobnnimadoonka ah* . . » *60*
*Go'aankii Muqdisho (1971)* . . . . . . » *71*
*Magacyada shisheeye ee Afkeennu soo amaahday* . » *63*
*Taarikhda iyo gabayga* . . . . . . . » *66*
*Kacaanka Oktoobar waa baaq qoddo dheer* . . » *68*
*Hantidaan wadaagno* . . . . . . . » *70*
*21-ka Jannaayo 1973, waa taariikh aan la halmaami karin* . . . . . . . . . » *71*

**Waxaa lagu daabacay Madbacadda Qaranka**

Xamar, 1974

**Sh. So. 2/-**